



Tubta Marinka Xanuunka Qalalka:

Waxa aad Filan karto Inta
Cunugaagu Koraayo





Si lagaaga caawiyo fahanka waxa ay uga dhigan tahay cunugaaga qabista cudurka qalalka, Gillette Children's ayaa abuurtay Tubta Xanuunka Qalalka. Daabacaadaan waxay ku tusaysaa sida adeeg bixiyaasha Gillette ay kaaga caawin karaan daboolista baahiyaha cunugaaga.

Ilmo kasta oo qaba xanuunka qalalka wuxuu leeyahay awoodaha iyo caqabadaha gaarka ah ee isku dhafan. Tasmadaan ayaa kuu sahlaya inaad fahanto xaalada cunugaaga qaba xanuunka qalalka. Waxaan filaynaa inay dhiiri gelin doonto wada hadal dhex mara bukaannada, qoysaska iyo dhakhaatiirta.

Waa maxay Gillette?

Gillette Children's waa isbitaal taqasus oo ku yaala St. Paul, MN. Maalin kasta Gillette ayaa sii kordhiya khibradiisa caafimaadka, cilmi baarista iyo shabakada u doodista si loo xaqiijiyo in bukaanadiisa ay ku noolaadaan nolol ku dhisan riyoooyinkooda, aana ku dhisnayn xanuunnada ay qabaan.

Gillette waxay bixisaa daryeel balaaran, oo isku dubaridan kaasoo yareeya saamaynta cudurka qalalku ku leeyahay noloshada dadka. Sabab la xiriirta inaan u jeedo astaanta guud ee xanuunka qalalka, laga bilaabo mid fudud ilaa mid daran, dhammaan bukaannada ayaa ka faa'iideysanaaya khibrada qotoda dheer, ayadoo aan loo eegayn xaaladahooda. Khubaradeena caafimaadka iyo baxnaaninta ayaa si dhaw ugala shaqeeya bukaannada, qoysaska, iyo daryeel bixiyaasha guud abuurista qorsheyaasha daawaynta kuwaasoo qoysaska kala jaanqaadaaya meesha ay ka marayaan safarkooda daryeelka.



Waa maxay xanuunka Qalalka?

Xanuunka qalalku waa cudur ka dhasha dhaawaca ku dhacay maskaxda kahor, intii lagu jiray, ama waxyar kadib dhalashada. Dhaawaca maskaxda ayaa badanaa carqaladeeya kobaca lafaha iyo murqaha. Wuxuu xanibi karaa dhaqdhaqaaqa iyo laabanka.

Dhibaatooyinka la xiriira waxaa ku jiri kara dhibaatooyin ka jira dareemaha, fikirka, garaadka, hadalka, iyo habdhaqanka. Qalalka iyo dhibaatooyinka qalfoofka kore ayaa sidoo kale imaan kara.

Inkastoo qalalka aan la dawayn karin, daawooyinka ayaa kaa caawin kara yareynta dhibaatooyinka iyo kor u qaadista awoodaha cunugaaga.

Si aad u Adeegsato Tasmadaan

Waxaad u adeegsan kartaa xogta ku qoran Qariirada Tubta Marinka Xanuunka Qalalka si aad u fahanto sida baaritaannada lagu taliyay iyo caawimaaduhu u caawin karaan cunugaaga. Tasmada ayaa loo nidaamshay qaab ku saleysan kooxda da'da, heerka Nidaamka Kala Sooca Shaqada Dhaqdhaqaaqa (Gross Motor Function Classification System, GMFCS), iyo sideed marxaladood ama aag oo saamaynaaya nolosha cunugaaga.

Nidaamyada kala sooca ayaa gacan kaa siinaaya qeexida nooca xanuunka waxayna qiyaas ka bixinayaan baahiyaha hadda iyo mustaqbalka ee qofka. Dhakhaatiirta caafimaadka ee Gillette ayaa adeegsada GMFCS si ay u qeexaan awoodaha guud ee dhaqdhaqaaqa. Nidaamkaan wuxuu diirada saarayaa shaqooyinka sida socodka, ilaalinta dheelitirnaanta ama garguurashada, kuwaasoo u baahan adeegsiga kooxaha badan ee murqaha. Si aad u hesho faahfaahin gaar ah oo ku saabsan GMFCS, arag Lifaaqa 1. Dhakhtarkaaga ayaa kaa caawin doona fahanka sida nidaamka kala-soocu u quseeyo cunugaaga.

Istaaga iyo socodku waa xirfado ay carruurta bartaan mudada ay korayaan oo dhan ayna sii wadaan inay sii hormariyaan marka ay sii waynaadaan. Dhaqdhaqaaqyadaan ayaa ku tiirsan adeegsiga kooxaha badan ee murqaha iyo dhaqaajinta jirka oo dhan. Waxaan aqoonsan nahay in awoodaha dhaqdhaqaaqa ilmuhu ku xiran yihiin da'da, gaar ahaan inta lagu jiro saqiirnimada hore iyo carruurnimada hore. Sababtaas awgeed, xogta ku qoran tasmadaan ayaa loo qaybiyaa afar kooxaha da'da ah:

 **Saqiirka iyo Socod Baradka (0 ilaa 3)**

 **Carruurnimada Hore (4 ilaa 6)**

 **Carruurnimada Dhexe (7 ilaa 12)**

 **Kuraynimada (13 ilaa 18)**

Waxaan ku talinaynaa in aad eegto xogta kooxda da'da cunugaaga, kadib aad go'aansato adoo kaashanaaya dhakhtarkaaga noocyada marxaladaha ama aagaga quseeya cunugaaga.

- Dhaqdhaqaaqa
- Dhismaha Murqaha iyo Qalfoofka
- Hadalka iyo Garaadka
- Cunto Cunista iyo Nafaqada
- Kobaca Bulshanimada/Shucuurta iyo Habdhaqanka
- Daryeelka naftiisa iyo Xirfadaha Nolol Maalmeedka
- Shaqooyinka Dareemaha
- Dalxiiska iyo Jirdhiska

Koox kasta oo da'eed, waxaad sidoo kale ka helaysaa liiska dhakhaatiirta ugu muhiimsan ee cunugaagu kula kulmi karo Gillette. Dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona baaritaannada iyo caawimaadaha ku haboonaan kara cunugaaga.

Walaacyada Dhaqdhaqaaqa iyo Qaabka Jirka

Sabab la xiriirta in qalalku yahay xanuun saameeya dhaqdhaqaaqa iyoq aabka jirka, carruurta qaba qalalka ayay u badan tahay inay qabaan midkood ama ka badan astaamaha soo socda:

Shaqada Murqaha oo Aan caadi ahayn

- Tigtignaan: Muqaha luqaha iyo gacmaha ayaa aad u qalafsan, diidaaya dhaqdhaqaaqa ayna u badan tahay inay gariiraan (jawrarka joogtada ah ee murqaha ama dhaqdhaqaaqa lama filaanka ah). Adkaanta ayaa caadiyan sii kororta marka dadku iskudayaan inay si dhakhso ah u dhaqaaqaan.
- Adkaanta: Murqaha lugaha iyo gacmaha ayaa aad u adag ayna adag tahay in la dhaqaajiyo, ayadoo aan loo eegayn si degdega ah ama xooga badan ee qofku u dhaqaaqo.
- Laclaca: Gacmaha iyo lugaha ayaa noqda laclac aana diidi karin dhaqaaqa (tamar darida murqaha).

Dhaqdhaqaaqa aan la Xakameyn karin

- Lawlawga: Dhibaatooyin ka jira isku dheelitirnaanta iyo sugnaanta, dhaqdhaqaaq gariir ah ama luxmaaya.
- Kogida: Dhaqdhaqaaqa dheeriga ah ee gaabiska ah, joogtada ah, oo aan la xakamayn karin, oo gaar ahaana ka jira garbaha, gacmaha, cagaha iyo aaga afka. Dhaqdhaqaaqyada noocaas ah ayaa kasii dari kara marka ilmuhu iskudayo inuu dhaqaaqo, laakiin sidoo kale waxay imaan karaa marka ilmuhu uu nasanaayo.
- Chorea: Dhaqdhaqaaqa aan nidaamsanayn, aan loo qasdin, oo badanaa joogtada ah oo ay sameeyaan gacmaha iyo luguhu kaasoo ka dhigaaya ilmaha mid rafanaaya.
- Dystonia: Shaqada murqaha oo badanaa keenta dhaqdhaqaaq qaloocan ama soo noqnoqda ama qaababka jirka oo khariban.

Xanuunka waxaa badanaa lagu saleeyaa qaybaha jirka ee uu ku dhaco:

- Diplegia: Labada lugood ayaa ah aaga ugu badan ee xanuunku ku dhaco. Qofka ayaa dhib ku qabi kara dhaqdhaqaaqa gacanta ama garabka.
- Naafanimada afarta adin: Labada gacmood, labada lugood iyo saabka jirka ayay saamayn ku dhacday. Murqaha qoorta, wajiga, afka, iyo dhuunta ayaa sidoo kale saamayntu ku dhici kartaa.
- Naafada halka jeex: Gacanta iyo lugta hal jeex ayaa ah qaybaha jirka ee saamaynta ugu badan ku dhacday. (Hoos ka eeg xog dheeri ah oo ku saabsan naafada halka jeex.)

Ka eeg bogga 31 qeexitaannada buuxa ee erayada.

Naafada halka jeex

Naafada halka jeex waa nooca ugu badan ee xanuunka qalalka ku dhaca carruurta aan ku dhalan dhiciska. Inta badan waxaa keena istarooga. Dadka qaba naafada halka jeex ayaa qaba naafada dhaqdhaqaaqa lugta, gacanta iyo qaarka hore ee hal gees oo kamid ah jidhka. Daawooyinka ilmaha qaba naafada halka jeex ayaa ka duwan daawooyinka ilmaha qaba naafada labada jeexba ee jidhka.

Ilmaha qaba naafada halka jeex, gacanta ayaa ka naafo badan lugta, cumaacunta iyo gacanta hore ayaana ka naafo badan garabka. Naafada suxulka ayaa kaladuwan. Si taas lamid ah, carruurta ayay u badan tahay inay dhibaato ka qabaan anqawga iyo cagta in ka badan xanuunka sinta ama lawga. Carruurta qaba naafada wayn ayay u badan tahay inay u baahdaan baxnaanin adag si loo hormariyo shaqada jirka. Carruurta qaba naafada halka jeex ayaa si joogto ah hormar uga sameeyay qiimeynta dhaqdhaqaaqa lugta (qaarka hoose) kuna liita qiimeynada lagu sameeyo gacmahooda (qaarka kore) iyo awoodaha dugsiga.

Carruurta qaba qalalka naafada halka jeex ayaa:

- Socod baran kara xili danbe da'dooda waxayna dhib ku qabaan dheelitirka iyo/ama maareynta socodka. Waxaa intaas dheer, waxay caadiyan socdaan ayagoon isticmaalin kaalmada socodka.
- Waxay dhib ku qabaan xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud iyo hawlaha daryeelka naftooda ayna ku jiraan wax qorista, labiska iyo isqurxinta.
- Waxay leeyihiin murqo daciif ah iyo/ama qalafsan dhinaca jirka ee xanuunku ka hayo.
- Waxay badanaa qabaan xanuunnada dhaqdhaqaaqa.
- Waxay waajahaan qalal, ayadoo ku xiran qaybta maskaxda ee waxyeeladu ku dhacday ama qaybta maskaxda ee dhaawucu gaaray.
- Waxay waajahaan caqabadaha dhanka garaadka sida naafooyinka waxbarashada. Tan ayaa ku badan carruurta qaba xanuunka qalalka.

Daawooyinka la Heli karo

Dhakhaatiirta ayaa ku talin kara in ilmaha qaba xanuunka qalalka:

- Uu xidho qabatooyin ama xajiyaal si loo kala bixiyo murqaa iyo/ama kor loogu qaado shaqada gacanta iyo cumaacumaha.
- Inuu qaato daawooyinka (caadiyan cirbadaha) si loo yareeyo adkaanta murqaha gaarka ah ee labada qaybaha kore iyo hoose ee jirka.
- In lagu sameeyo qaliinka lafaha iyo murqaha si looga hortago ama loo saxo ciladaha lafaha iyo/ama murqaha korna loogu qaado adeegsiga lugaha iyo gacmaha.
- Inay qaataan daawooyin si loo maareeyo xanuunnada dhaqdhaqaaqa, qalalka iyo dhibaatooyinka waxbarashada.
- Inay ka qaybgalaan baxnaaninada sida baxnaaninta jirka, baxnaaninta shaqada ama baxnaaninta hadalka.

Nidaamyada Kala Sooca

Dhakhaatiirta ayaa adeegsada aaladaha kaladuwan ee qiimeynta iyo nidaamyada kala sooca marka ay baarayaan xanuunka qalalka iyo qorshaha daawaynta.

Nidaamyada Kala Sooca Shaqada Dhaqdhaqaaqa guud (GMFCS)

Dhakhaatiirta Gillette Children's ayaa adeegsada Nidaamka Kala-sooca Shaqada Dhaqdhaqaaqa guud (GMFCS) si loo qeexo awoodaha dadka qaba xanuunka qalalka. Qaybaha GMFCS ayaa awooda saaraaya awooda qofka ee dhaqdhaqaaqa si iskiis ah (dhaqdhaqaaqa qofku hagaayo) ayadoo diirada la saaraayo dhaqdhaqaaqa fadhiga, socodka iyo wax riixida. Farqiga u dhexeeya heerarka waxaa lagu saleeyaa awoodaha, baahida loo qabo tignooloojiyada Kaalmaatiga ah (ayna ku jiraan qalabka socodka, ulaha lagu boodo ama gaari curyaanka) iyo—heerka fudud—tayada dhaqdhaqaaqa.

Gillette ayaa u adeegsata GMFCS diirad saarida awoodahaan. Waxaan eegnaa sida dadku uga shaqeeyaan guriga, dugsiga iyo goobaha bulshada badelkii aan eegi lahayn waxa ay sida ugu wanaagsan u qaban karaan. Heerarku waxay naga caawiyaan inaan qeexno xaaladaha; ma sheegaan sifooyinka cudurka. Marka ilmuhu qaangaaraan, heerarkooda GMFCS ayaa isbadeli kara. Akhri GMFCS ku qoran Lifaaqa 1.

Nidaamka Kala Sooca Awooda Caadiga ah (Manual Ability Classification Systems, MACS ka yar iyo MACS)

Qaar kamid ah dhakhaatiirteena Gillette dhakhaatiirta kale ayaa adeegsada Nidaamka Kala Sooca Awooda Caadiga ah (MACS ka yar iyo MACS) si ay uga hadlaan sida dadka qaba xanuunka qalalka u adeegsadaan gacmahooda si ay u maamulaan waxyaabaha ku jira shaqooyinkooda maalinlaha ah. Walxaha ku jira waa kuwo quseeya kuna haboon da'da carruurta, loona adeegsado marka ay qabtaan shaqooyinka sida cunto cunista, labiska, ciyaarta, wax sawirida ama wax qorista. Mini-MACS waxaa loogu talo galay carruurta da'aha 1-4. MACS waxaa loogu talo galay carruurta 4-18. Si aad u hesho xog dheeri ah, eeg Lifaaqa 2.

Nidaamka Kala Sooca Shaqada Hadalka (Communication Function Classification System, CFCS)

Gillette waxay adeegsataa CFCS si ay ugu kala saarto shaqada maalinlaha ah ee hadalka ee qofka qaba xanuunka qalalka midkood shanta heer. CFCS waxaa diirada lagu saaraa heerarka shaqada iyo ka qaybgalka sida ku qoran Qeexitaanka Caalamiga ah ee Shaqada, Naafada, iyo Caafimaadka (ICF) ee Ururka Caafimaadka Aduunka (World Health Organization's (WHO)).





Kooxaha daryeelka ee Gillette ayaa kala shaqeeya qoysaska qiimeynta waxtarka guud ee shaqada hadalka qofka ayadoo lagu saleynaayo sida uu caadiyan uga qaybgalo marxaladaha maalin kasta ee u baahan hadalka, badelkii la eegi lahaa awoodiisa ugu wanaagsan. Xaaladahaan maalin kasta ayaa ka dhici kara guriga, dugsiga, iyo deegaanka. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan CFCS, eeg Lifaaqa 3.

Nidaamka Qaybta Awooda Cunista iyo wax Cabista (Eating and Drinking Ability Classification System, EDACS)

Nidaamka Qaybta Awooda Cunista iyo wax Cabista (EDACS) ayaa ka caawiya dhakhaatiirta Gillette inay cadeeyaan sida shaqsiyaadka qaba qalalku wax u cunaan una cabaan maalin kasta. Farqiga u dhexeeya heerarka kaladuwan ee EDACS waxaa lagu saleeyaa awooda shaqada, baahida dhaqan gelinta dhadhanka cuntada iyo cabitaanka, farsamooyinka la adeegsado iyo qaybaha kale ee bii'ada. Waxay qeexaysaa dedaalka guud ee wax cunista iyo cabista, kaasoo ay ku jiraan labadaba qaybaha dhaqdhaqaaqa iyo dareemaha. Nooca hadda ee EDACS ayaa qeexaaya awoodaha wax cunista iyo cabista ee carruurta qaba naafada qalalka laga bilaabo da'da 3. Arag Lifaaqa 4.

Kooxaha Da'da

Xogta ku qoran tasmadaan ayaa loo qaybiyaa kooxahaan da'da:

-  **Saqiirka iyo Socod Baradka (0 ilaa 3)**
-  **Carruurnimada Hore (4 ilaa 6)**
-  **Carruurnimada Dhexe (7 ilaa 12)**
-  **Kuraynimada (13 ilaa 18)**

Waxaan ku talinaynaa in aad eegto xogta adoo adeegsanaaya kooxda da'da ee cunugaaga. Dhakhaatiirtaada ayaa kaala hadli doona baaritaannada suuragalka ah iyo caawimaadaha ku haboonaan kara cunugaaga.

**Saqiirka iyo Socod
Baradka (0 ilaa 3)**



Saqiirka iyo Socod Baradka (0 ilaa 3)

Heerka	Dhaqdhaqaaqa	Dhismaha Murqaha iyo Qalfoofka
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I	<ul style="list-style-type: none"> • Ku durkaaya marna ka durkaaya goobta uu fadhiyo asagoo aan cidna caawin • Awooda inuu isku dheelitiro marka uu fadhiyo uuna adeegsado labadiisa gacmoodba marka uu ciyaaraayo • Ku gurguuranaaya gacamaha iyo lawyada • Wax cuskanaaya si uu u istaago • Talaabsanaaya asagoo cuskanaaya alaabta guriga, roogaga • Soconaaya asagoo aan la caawin marka uu gaaro 24 bilood; asagoo bilaabaaya inuu doorto inuu soo wareego asagoo soconaaya 	<ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu awoodi doonaa inuu xakameeyo dhaqdhaqaaqa dhudhumada aan naafada ahayn iyo sinaha iyo lawga lugta xanuunsan, laakiin wuxuu dhib ku qabayaa dhaqaajinta faraha cagaha, cagta iyo anqawga lugta naafada ah. • Wuxuu adkaan ka dareemayaa murqaha hore ee gacanta (haddii uu qabo naafada halka jeex ah) • Waajahaaya socodka faraha cagta ama gariirka
II	<ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu awoodi doonaa inuu gal kana baxo goobta fadhiga si iskiis ah • Wuxuu dhib ku qabi doonaa dheelitirnaanta marka uu fadhiyo uuna adeegsado labadiisa gacmoodba marka uu ciyaaraayo • Gaban-dhacleynta, dabo ku socoshada, ama ku gurguurashada gacmaha iyo lawyaha • Wax cuskashada si uu u istaago uuna u socdo asagoo qabsanaaya alaabta guriga • Soconaaya asagoo adeegsanaaya aalada kaalmaatiga ah 	<ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu awoodi doonaa inuu xakameeyo dhaqdhaqaaqa dhudhumada aan naafada ahayn iyo sinaha iyo lawga lugta xanuunsan, laakiin wuxuu dhib ku qabayaa dhaqaajinta faraha cagaha, cagta iyo anqawga lugta naafada ah. • Wuxuu adkaan ka dareemayaa murqaha hore ee gacanta (haddii uu qabo naafada halka jeex ah) • Wuxuu wajahayaa dhaqdhaqaaqa faraha cagta, gariirka faraha ama raabsiga faraha. • Wuxuu muujinayaa inuu jeclaado adeegsiga gacanta aan naafada ahayn (haddii uu jiro naafada halka jeex)
III	<ul style="list-style-type: none"> • Gaban-dhacleynta, dabo ku socoshada ama ku gurguurashada gacmaha iyo lawyaha • U baahashada caawimaad si uu u fariisto, haddii uu iskiis u fadhiyo, caadiyan wuxuu doorbidayaa "fadhiga w" waayo wuxuu u sahlayaa gacmaha inay u madax banaanaadaan ku ciyaarida boonbaleyaasha • Wax cuskashada si uu u istaago uuna u socdo bad gaaban asagoo qabsanaaya alaabta guriga • Ku socoshada aalada socodka, sida usha lagu socdo taasoo ka caawinaysa dhaqaaqa iyo leexashada 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaatooyin uu ku qabo xakamaynta dhaqdhaqaaqa gacamaha iyo lugaha, ayna ku jiraan sinaha • Waajahaaya adkaanta dheeriga ah ee lugaha (taasoo la socon karta xanuunnada kale ee dhaqdhaqaaqa sida athetosis ama dystonia) • Wuxuu wajahayaa dhaqdhaqaaqa faraha cagta, gariirka faraha ama lawyaha oo angagan. • Wuxuu waajahayaa meelaynta liidata ee sinaha iyo xasilooni darada araxda • Wuxuu muujinayaa inuu jeclaado adeegsiga gacanta aan naafada ahayn (haddii uu jiro naafada halka jeex)
IV	<ul style="list-style-type: none"> • Gaban-dhacleynta ama bari ku xamaarashada si uu u socdo • U adeegsiga gacmaha si ay uga taageeraan fadhiga asagoo aan qalab adeegsan • Adeegsiga qalabka kaalmada si uu u fariisto iyo/ama u istaago 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaato ka haysata xakamaynta dhaqdhaqaaqa lugaha sabab la xiriirta naafada lugaha, ayna ku jiraan sinaha • Dhibaato ka haysata xakamaynta dhaqdhaqaaqa gacamaha • Waajahaaya adkanta lugta iyo gacanta, laakiin lugaha ayaa saamayntu ku badan tahay • Waajahaaya xanuunnada kale ee dhaqdhaqaaqa (athetosis ama dystonia) • Wuxuu qabaa jawrarka murqaha ee xakamayn kara dhaqdhaqaaqa * Wuxuu qabaa kala baxa/murgacashada sinaha, qalooca dheer ee tafta ama qaloocyada cagaha
V	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaato ka haysata xakamaynta madaxa iyo qaarka sare inta badan boosaska • Adeegsiga qalabka kaalmada si uu u fariisto ama u istaago • Socsocoshada keliya marka uu helo caawimaad ama qalabka la qabsiga, ayna ku jiraan gaari curyaanka korontada ku shaqeeya 	<ul style="list-style-type: none"> • Inuusan awoodin xakamaynta dhaqdhaqaaqa gacamaha iyo lugaha • Wuxuu qabaa adkaanta lugta iyo gacanta, ayadoo lugaha ay u badan yihiin (marka laga reebo naafada halka jeex markaas oo gacantu ay badanaa naafada u badan tahay) • Waajahaaya jawrarka murqaha oo xakamaynaaya heerka dhaqdhaqaaqa kala-goysyada, gaar ahaana lugaha • Wuxuu qabaa kala baxa/murgacashada sinaha iyo/ama qaloocyada cagaha

Heerka	Hadalka iyo Garaadka	Cunto Cunista iyo Nafaqada
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I- II	<ul style="list-style-type: none"> • Hadaaqa, hadal barashada iyo adeegsiga erayada; adeegsiga jumladaha 3 eray ah marka uu gaaro 3 sano • Wuxuu eegayaa codadka iyo jabaqda • Wuxuu bilaabayaa inuu fahmo, uuna raaco tilmaamaha • Laacista, qabsashada, adeegsiga ishaarada ama tilmaanta si uu u helo dareenka qofka kale, inuu ku tuso waxa aad magacooda sheegtay ama ku tuso waxa uu doonaayo • Dareen siinta buugaagta, muujinta xiiso ku aadan carruurta kale • Muujinta hiloow uu u qabo iyo ka hadalka shucuuraha kaladuwan 	<ul style="list-style-type: none"> • Ka guurista si tartiib ah caanaha quraacda ama caanaha iyo u guurista cuntada adag • Ka guurista masaasada uuna u guuro koobna iyo inuu iskiis caanaha u cabo • Dhibaato ka haysata in miisaankiisu kordho
III- IV	<ul style="list-style-type: none"> • Waajahaaya kobaca hadalka oo gaabis ah • Inuu u baahdo taageero sida sawirada, ishaarooyinka iyo wax saxiixida • Caawimaad ku aadan dhageysiga iyo samaynta dookhyada • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada waxbarashada iyo wax sababaynta • Dhibaato ka haysata inay fahmaan dadka dhagaysanaaya ee aan aqoon iyo qaar kamid ah dadka dhageysanaaya ee yaqaana 	<ul style="list-style-type: none"> • Waajahaaya dib u dhaca inuu iskiis wax u cuno • Dhibaato ka haysata quudinta haddii uu qabo daciifnimada murqaha afka, adkaanta iyo dhaqdhaqaaqa • Dhibaato ka haysata in miisaankiisu kordho • Waajahaaya dibiro, gaar ahaana marka dhaqdhaqaaqiisa iyo/ama cuntada ay kooban yihiin. • U baahan cunista noocyada gaarka ah ee cuntada ama adeegsiga xeeladaha gaarka ah si ay qaab amaan ah wax ugu cunaan
V	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga milicsiga isha, eegmada iyo ishaarooyinka wajiga si uu u hadlo • Waajahaaya kobaca hadalka oo gaabis ah • Dhibaato ka haysata dhageysiga • Inuu u baahdo taageero sida sawirada, ishaarooyinka iyo wax saxiixida • Caawimaad ku aadan dhageysiga iyo samaynta dookhyada • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada waxbarashada iyo wax sababaynta 	<ul style="list-style-type: none"> • Aan awoodin inuu cuno cuntooyinka laqmada gaarka ah leh • Waajahaaya dibiro, gaar ahaana marka dhaqdhaqaaqiisa iyo/ama cuntada ay kooban yihiin. • Inuu qabo ku saxashada ama soo celinta cuntada • Dhibaato ka haysata xakamaynta qaabka madaxa iyo jidhka taasoo saamayn karta ruugista iyo wax liqida



Saqiirka iyo Socod Baradka (0 ilaa 3) sii socda

Heerka	Kobaca Bulshanimada/ Shucuurta iyo Habdhaqanka	Daryeelka naftiisa iyo Xirfadaha Nolol Maalmeedka
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I	<ul style="list-style-type: none"> • Dhoola-cadeynta, isdhexgalka xubnaha qoyska iyo ilmaha faciis ah • Inuu si fudud u ooyo marka uu niyad jabsan yahay • Ku tiirsanaanta daryeeleyaasha si kor loogu qaado qanaacada jireed loona siiyo taageero inta lagu jiro hawlaha caafimaadka; adeegsiga khubarada nolosha ilmaha marka loo baahdo • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada bulshanimada • Qaba dhibaatooyinka shucuurta ama habdhaqanka 	<ul style="list-style-type: none"> • Joogteynta goobta fadhiga si uu u cunteeyo • Inuu iskii wax u cabo (qabsahada masaasada) marka uu gaaro 6 (taageero dheeri ah ama qabka fadhiga ayaa loo baahan karaa) • U baahan caawimaad ku aadan iska furista dharka, laakiin awooda inuu dharka iska siibo • Ku riixida gacamaha iyo lugaha dharka si uu u labisto/ dharka iskaga baxsho • Bilaabista caawimaad ku aadan dhaqista gacmaha iyo jirka • Bilaabista inuu kaa caawiyo shaqooyinka fudud ee guriga (soo uruurinta boonbaleyaasha, ku ridista dharka salad) marka uu gaaro 2 ilaa 3 sano
II- III	<ul style="list-style-type: none"> • Dhoola-cadeynta, isdhexgalka xubnaha qoyska iyo ilmaha faciis ah • Inuu si fudud u ooyo marka uu niyad jabsan yahay • Ku tiirsanaanta daryeeleyaasha si kor loogu qaado qanaacada jireed loona siiyo taageero inta lagu jiro hawlaha caafimaadka; adeegsiga khubarada nolosha ilmaha marka loo baahdo • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada bulshanimada • Qaba dhibaatooyinka shucuurta ama habdhaqanka 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaato inuu ku qabo isku xirka ficilka labada gacmoodba (sida qabsashada masaasada) • Adeegsiga taageerada dheeriga ah ee daryeelaha marka uu labisanaayo iyo marka uu dharka iska bixinaayo • Samaynta shaqooyinka fudud ama wax laga badelay ee guriga (ku uruurinta boonbalaha meel, soo qabsashada dharka uu xiranaayo asagoo adeegsanaaya ishaaro ama hadal)
IV- V	<ul style="list-style-type: none"> • Dhoola-cadeynta, isdhexgalka xubnaha qoyska iyo ilmaha faciis ah • Inuu si fudud u ooyo marka uu niyad jabsan yahay • Ku tiirsanaanta daryeeleyaasha si kor loogu qaado qanaacada jireed loona siiyo taageero inta lagu jiro hawlaha caafimaadka; adeegsiga khubarada nolosha ilmaha marka loo baahdo • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada bulshanimada • Qaba dhibaatooyinka shucuurta ama habdhaqanka 	<ul style="list-style-type: none"> • U baahan caawimaada buuxda ee meelaynta oo uu ka helo daryeeleyaasha si uu caanaha u cabo uuna u labisto • Adeegsiga nidaamyada fadhiga la qabsiga ee adeegsiga musqusha iyo qubayska si uu ugu jiro goobta fadhiga amaanka ah • Adeegsiga nidaamka hurdada ama aalada meelaynta si loo taageero isku aadinta saxda ah inta lagu jiro hurdada ayaa la sheegay

Shaqooyinka Dareemaha	Dalxiiska iyo Jirdhiska
<p style="text-align: center;">Cunugaaga ayaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa muhiim ah) • Qaba kala qaloocashada murqaha indhaha, sida il caweerada (strabismus) iyo il-bisnimo • Dhibaato ka haysata kobaca hadalka (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) 	<p style="text-align: center;">Cunugaaga ayaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga boonbaleyaasha sababta iyo saamaynta (wax kasta oo sameeya jabaq ama dhaqdhaaqaq ku saleysan ficilka ilmaha) • Jara-boodada, wax korista, dabaasha iyo sinbiqashada
<ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa muhiim ah) • Qaba kala qaloocashada murqaha indhaha, sida il caweerada (strabismus) iyo il-bisnimo • Dhibaato ka haysata ku ekaanta iyo isha la raacista wax (naafada wareega araga) • Dhibaato ka haysata maqlida codadka u dhow (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Dhibaato ka haysata kobaca hadalka (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Waajihida dhibaato ka haysata dareenka caadiga ah, gaar ahaana codadka ama waxyaabaha uu taabto (xanuunka isdhexgalka dareemaha) 	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga boonbaleyaasha sababta iyo saamaynta (wax kasta oo sameeya jabaq ama dhaqdhaaqaq ku saleysan ficilka ilmaha) • Bilaabista shaqada boodista, korista, dabaasha iyo sinbiqashada laakiin u baahan caawimaad
<ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa muhiim ah) • Qaba kala qaloocashada murqaha indhaha, sida il caweerada (strabismus) iyo il-bisnimo • Dhibaato ka haysata ku ekaanta iyo isha la raacista wax (naafada wareega araga) • Dhibaato ka haysata maqlida codadka u dhow (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Waajihida dhibaato ka haysata dareenka caadiga ah, gaar ahaana codadka ama waxyaabaha uu taabto (xanuunka isdhexgalka dareemaha) • Doorbidaaya inuu eego midabyada qaarkood, dhaqdhaaqaq ama nalka 	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga boonbaleyaasha sababta iyo saamaynta (wax kasta oo sameeya jabaq ama dhaqdhaaqaq ku saleysan ficilka ilmaha) • Ku raaxaysiga boodista iyo dabaasha; aan awoodin inuu bilaabo dhaqdhaaqaqyada



Saqiirka iyo Socod Baradka (0 ilaa 3) sii socda

Heerka	Qiimeynada iyo Baaritaannada	Caawimaadaha	Kooxdaada Daryeelka Adeeg bixiyaasha muhiimka ah waxaa lagu qoray far waawayn
	Kooxdaada daryeelka ayaa ku talin karta:	Kooxdaada daryeelka ayaa ku talin karta:	
I	<ul style="list-style-type: none"> Baaritaanka jidhka, taariikhda caafimaadka iyo baaritaannada kobaca ee dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud (xaalada shaqo) Baaritaannada raajada, sida MRI ama iskaanka CT, si loo go'aansho sababta keenaysa xanuunka qalalka ama aaga dhaawaca maskaxda Raajada sinaha marka uu gaaro 12 bilood iyo marka uu gaaro 3 sano si looga baaro kala baxa/qalooqa lafaha Baaritaanka aragga, maqalka, kobaca, nafaqada, saxarada, kaadi haysta, hurdada, wax liqida iyo xanuunka Baaritaanka hide sidaha Balamaha lala yeesho dhakhaatiirta muhiimka ah 3 bilood kasta ama wax lamid ah Baaritaanka cudurka oo lagu sameeyo neerfaha imaha 	<ul style="list-style-type: none"> Daawooyinka si kor loogu qaado dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha socodka guud, iyo si looga hortago ama loo saxo qalooqa Daawo lagu yareynaayo adkaanta/tigtignaanta, sida botulinum toxin Maareynta xanuunnada la xiriira, sida suuxinta Baxnaaninta jirka, shaqada, hadalka iyo luuqada La shaqeynta degmo dugsiyeedka deegaankaaga ama adeegyada caawimaada carruurta Agabka tolmada si loo ilaaliyo toosnaanta loona siiyo xasilooni kala-goys (oo caadiyan quseeya cagaha/anqawiyada iyo gacmaha/ cumaacumaha) Taageerada noloshu ilmaha inta lagu baaritaannada Caawimaada shaqada bulshada oo la siiyo khayraad, tacsida 	<p>Khubarada Qalabka Kaalmada/Bixiyaha Qalabka Caafimaadka Dhakhtarka Maqalka Khabiirka Noloshu Ilmaha</p> <p>Dhakhtarka Carruurta ee Kobaca iyo Habdhaqanka</p> <p>Dhakhtarka Dheefshiidka dhakhtarka xanuunada hidaha</p> <p>Dhakhtarka cilmi Nafsiya Neerfaha kalkaalisada</p>
II-III	<ul style="list-style-type: none"> Baaritaanka jidhka, taariikhda caafimaadka iyo baaritaannada kobaca ee dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud (xaalada shaqo) Baaritaannada raajada, sida MRI ama iskaanka CT, si loo go'aansho sababta keenaysa xanuunka qalalka ama aaga dhaawaca maskaxda Raajada sinaha marka uu gaaro 12 bilood iyo marka uu gaaro 6 ilaa 12 bilood intaas kadib si looga baaro kala baxa/qalooqa lafaha Baaritaanka aragga, maqalka, kobaca, nafaqada, saxarada, kaadi haysta, hurdada, wax liqida iyo xanuunka Baaritaanka hide sidaha Balamaha lala yeesho dhakhaatiirta muhiimka ah 3 bilood kasta ama wax lamid ah Baaritaanka cudurka oo lagu sameeyo neerfaha imaha 	<ul style="list-style-type: none"> Daawooyinka si kor loogu qaado dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha socodka guud, iyo si looga hortago ama loo saxo qalooqa Daawo lagu yareynaayo adkaanta/tigtignaanta, sida daawooyinka dejiya murqaha afka, botulinum toxin, ama phenol Maareynta xanuunnada la xiriira, sida suuxinta Baxnaaninta jirka, shaqada, hadalka iyo luuqada La shaqeynta degmo dugsiyeedka deegaankaaga ama adeegyada caawimaada carruurta Agabka tolmada si loo ilaaliyo toosnaanta loona siiyo xasilooni kala-goys (oo caadiyan quseeya cagaha/anqawiyada iyo gacmaha/ cumaacumaha) Qalabka kaalmada dhaqdhaqaaqa (sida aalada socodka) iyo meelaynta (sida kursiga gaariga) Taageerada noloshu ilmaha inta lagu baaritaannada Caawimaada shaqada bulshada oo la siiyo khayraad, tacsida 	<p>Dhakhtarka Kalkaalinta</p> <p>Dhakhtarka Lafaha</p> <p>Dhakhtarka Qanjirada Gudaha ee Carruurta ENT ga Carruurta</p> <p>Dhakhtarka Neerfaha Carruurta</p> <p>Dhakhtarka Qaliinka Neerfaha Carruurta</p> <p>Dhakhtarka Lafaha iyo murqaha ee Carruurta</p> <p>Dhakhtarka Caafimaadka Baxnaaninta Carruurta</p> <p>Dhakhtarka Nafsiya/ Dhimirka</p> <p>Dhakhtarka Sanbabka</p>
IV-V	<ul style="list-style-type: none"> Baaritaanka jidhka, taariikhda caafimaadka iyo baaritaannada kobaca ee dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud (xaalada shaqo) Baaritaannada raajada, sida MRI ama iskaanka CT, si loo go'aansho sababta keenaysa xanuunka qalalka ama aaga dhaawaca maskaxda Raajada sinaha marka uu gaaro 12 bilood iyo marka uu gaaro 6 ilaa 12 bilood intaas kadib si looga baaro kala baxa/qalooqa lafaha Baaritaanka aragga, maqalka, kobaca, nafaqada, saxarada, kaadi haysta, hurdada, wax liqida iyo xanuunka Baaritaanka hide sidaha Balamaha lala yeesho dhakhaatiirta muhiimka ah 3 bilood kasta ama wax lamid ah Baaritaanka cudurka oo lagu sameeyo neerfaha imaha Wuxuu u baahan karaa VFSS ama FEES sii loo baaro badqabka liqista cuntada uu afka ka qaato 	<ul style="list-style-type: none"> Daawooyinka si kor loogu qaado dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha socodka guud, iyo si looga hortago ama loo saxo qalooqa Daawo lagu yareynaayo adkaanta/tigtignaanta, sida botulinum toxin ama phenol Maareynta xanuunnada la xiriira, sida suuxinta Baxnaaninta jirka, shaqada, hadalka iyo luuqada La shaqeynta degmo dugsiyeedka deegaankaaga ama adeegyada caawimaada carruurta Agabka tolmada si loo ilaaliyo toosnaanta loona siiyo xasilooni kala-goys (oo caadiyan quseeya cagaha/anqawiyada iyo gacmaha/ cumaacumaha) Qalabka qubeyska Qalabka kaalmaatiga dhaqdhaqaaqa iyo meelaynta sida aalada la riixo, gaari curyaanka, aalada istaaga ama qalabka socodka Taageerada noloshu ilmaha inta lagu baaritaannada Caawimaada shaqada bulshada oo la siiyo khayraad, tacsida Qalabka, daawooyinka ama isbadellada si loo yareeyo damaca, xalinta dhibaatooyinka wax liqista, xakamaynta calyada, iwm. 	<p>Taqasulaha Caafimaadka Hurdada</p> <p>Shaqaalaha Bulshada</p> <p>Taqasulaha Daawaynta Raaxaysiga leh</p> <p>Baxnaaniyaasha - Baxnaaniyaha Shaqada Baxnaaniyaha Jirka Dhakhtarka Hadalka iyo Luuqada</p>

**Carruurnimada Hore
(4 ilaa 7)**





Carruurnimada Hore (4 ilaa 7)

Heerka	Dhaqdhaqaaqa	Dhismaha Murqaha iyo Qalfoofka
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I	<ul style="list-style-type: none"> • Aadista kor iyo hoos dabaqa iyo ka bixida iyo fuulista kursiga asagoo aan cuskan gacmaha • Socoshada badadka dhaadheer ee banaanka iyo meelaha aan sinayn • Fuulida jaranjarooyinka • Bilaabista orodka iyo boodista 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaatooyin ka haysta xakamaynta dhaqdhaqaaqa faraha cagaha, cagta, iyo anqawga lugta xanuunsan • Waajihida adkaanta/jawrararka murqaha cagaha • Waajahaaya socodka faraha cagta ama gariirka • Wuxuu adkaan ka dareemayaa murqaha hore ee gacanta (haddii uu qabo naafada halka jeex ah) • Waajihida ciladaha cagaha, sida cag siman ama cag dhexda ka qaloocan
II	<ul style="list-style-type: none"> • Ku fariisiga kursi iyo adeegsiga labada gacmoodba asagoo aan helin caawimaad • Ka tagista saxxada ama kursiga si uu u istaago asagoo adeegsanaaya meel xasiloon si uu u jiido ama u u cuskado • Ku socoshada gudaha asagoon adeegsan aalada kaalmada, laakiin aan awoodin inuu socdo badad dhaadheer, uu ordo uuna boodo • Korista jaran-jarooyinka asagoo cuskanaaya geesaha jaran-jarta 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaatooyin ka haysta xakamaynta dhaqdhaqaaqa faraha cagaha, cagta, anqawga iyo lawga lugta xanuunsan • Waajahaaya adkaanta/qalayfka dheeriga ah ee murqaha ee murqo badan oo kuwa lugaha ah (dhudhunka, lawga iyo gudha bawdada) • Wuxuu wajahayaa dhaqdhaqaaqa faraha cagta, gariirka faraha ama raabsiga faraha. • Wuxuu adkaan ka dareemayaa murqaha hore ee gacanta (haddii uu qabo naafada halka jeex ah) • Waajihida ciladaha cagaha, sida cag siman ama cag dhexda ka qaloocan • Wuxuu muujinayaa inuu hiow adag u qabo adeegsiga gacanta aan naafada ahayn (haddii uu jiro naafada halka jeex)
III	<ul style="list-style-type: none"> • Ku socoshada gudaha asagoo adeegsanaaya aalada kaalmaatiga' adeegsiga gaari curyaanka banaanka ama badadka dhaadheer • Wuxuu awoodaa inuu fuulo uuna ka degto kursiga asagoo adeegsanaaya meel siman oo uu cuskado • Wuxuu u baahan yahay taageerada sinaha ama qaarka kore marka uu ku fadhiyo kursi si uu ugu adeegsado gacmaha ciyaarta • Ka istaagida fadhiga asagoo adeegsanaaya taageerada gacanta • Korista jaranjarooyinka ama ku socoshada meelaha aan sinayn marka uu caawimaad ka helo qof wayn 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaatooyin uu ku qabo xakamaynta dhaqdhaqaaqa gacmaha iyo lugaha, ayna ku jiraan sinaha • Waajahaaya adkaanta dheeriga ah ee lugaha (taasoo la socon karta xanuun kale ee dhaqdhaqaaqa sida athetosis ama dystonia) • Wuxuu wajahayaa dhaqdhaqaaqa faraha cagta, gariirka faraha ama lawyaha oo angagan. • Wuxuu waajahayaa meelaynta liidatda ee sinaha iyo xasilooni darada araxda • Wuxuu muujinayaa inuu hiow adag u qabo adeegsiga gacanta aan naafada ahayn (haddii uu jiro naafada halka jeex)
IV	<ul style="list-style-type: none"> • Fariisiga iyo istaaga asagoo adeegsanaaya meel siman oo uu cuskado ama marka uu caawiyo qof wayn • Inuu iskiis u fariisto laakiin uu u baahan yahay taageerada dheeriga ah ee jirka ama qaarka hore si uu ugu adeegsado gacmaha ciyaarta • Ku socoshada badadka gaagaaban aalada socodka ama tababaraha socodka asagoo caawimaad ka helaaya ama ka helayn qof wayn • Adeegsiga gaari curyaanka gacanta lagu riixo ama gaari curyaanka korontada ku shaqeeya si uu u aado bad dhaadheer 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhib ka haysta xakamaynta dhaqdhaqaaqa lugaha (ayna ku jiraan sinaha) iyo gacmaha • Waajahaaya adkaanta lugaha iyo gacmaha; lugaha ayay u badan tahay inay cilada ugu badan qabaan • Wuxuu qabaa jawrarka murqaha ee xakamayn kara dhaqdhaqaaqa • Waajahaaya xanuunnada kale ee dhaqdhaqaaqa (athetosis/dystonia) • Dhibaato ku qaba istaaga ama socodka • Wuxuu qabaa kala baxa/murgacashada sinaha, qalooca dheer ee tafta ama qaloocyada cagaha • Wuxuu qabaa naafada araxda, sida scoliosis ama kyphosis
V	<ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu u baahan yahay daryeele si uu uga caawiyo badelida qaababka • Dhibaato ayuu ku qabaa inuu iskiis u fariisto iyo xakamaynta qaabka madaxa iyo jidhka inta badan meelaha • Adeegsiga qalabka kaalmada si uu u fariisto ama u istaago • Wuxuu keliya socon karaa marka uu adeegsado qalabka adag ee dhaqdhaqaaqa iyo caawimaada jirka 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhib ka haysta xakamaynta dhaqdhaqaaqa lugaha (ayna ku jiraan sinaha) iyo gacmaha • Waajahaaya jawrarka murqaha oo wata murqaha adkaaday, gaar ahaana lugaha • Waajahaaya kala baxa/murgacashada sinaha, ciladaha cagta ama awdanka sinaha (leexsanka) • Wuxuu qabaa naafada araxda, sida scoliosis ama kyphosis • Dhibaato ku qaba xakamaynta madaxa

Heerka	Hadalka iyo Garaadka	Cunto Cunista iyo Nafaqada
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I- II	<ul style="list-style-type: none"> • U la hadlida si wax ku ool ah dadka uu yaqaano iyo kuwaan aqoon ee dhageysanaaya, wuxuu u hadli karaa si gaabis ah • Fulinta amarada talaabooyinka kaladuwan leh • Inuu si madax banaan ula hadli karo dad kaladuwan oo jooga goobo kaladuwan • Adeegsiga luuqada si uu u akhriyo ABC, midabyada, iwm. • Adeegsiga jumladaha ka kooban 4- ilaa 6 eray, waydiinaaya su'aalaha qofkee iyo sababtee, sheegista sheekooyinka fudud • Bilaabista iyo sii wadista isdhexgallada bulshada • Muujinta caadiyan xirfadaha guud ee luuqada iyo kobaca garaadka. • Qabista dhibaatooyinka dareemaha • Awooda qeexida baahiyaha iyo doonista lagu helo hadalka/ ishaarada/hambariirta wajiga 	<ul style="list-style-type: none"> • Quudinta naftiisa • U baahan kormeer marka uu cunteynaayo
III- IV	<ul style="list-style-type: none"> • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada waxbarashada iyo wax sababaynta • Qabista dhibaatooyinka dareemaha • U baahan taageero si uu ula hadlo dadka dhagaysanaaya ee uusan aqoon iyo mararka qaar kuwa uu yaqaano • Awooda inuu soo jiito dareenka qof uu yaqaano si uu ula hadlo 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaato ku qaba wax cunista haddii murqaha afku kala qaloocan yihiin, daciif yihiin ama adkaadaan • Dhibaato ka haysata in miisaankiisu kordho • Aan awoodin inuu cuno cuntooyinka laqmada gaarka ah leh • Qaba dibiro, gaar ahaana marka dhaqdhaqaaqiisa iyo/ ama cuntada ay kooban yihiin.
V	<ul style="list-style-type: none"> • U baahan caawimaada hadalka ee marxalado badan, gaar ahaana dadka iyo bii'ooyinka uusan aqoon • U sheegista baahiyaha iyo doonisyada joogtada ah dadka uu yaqaano • Aqbalaada, diidista/qaadacida iyo/ama diidista dookhyada asagoo ku muujinaaya dhaqdhaqaaqyada jirka, ishaarada wajiga iyo cod ahaan • Ka jawaabida codadka iyo dhawaaqyada asagoo adeegsanaaya dhaqdhaqaaqyada jidhka, ishaarada wajiga ama codadka. • Filanaaya shaqooyinka, hawlaha joogtada ah • U baahan taageero si uu u barto fikradaha luuqada, u akhriyo ABC, midabyada, iwm. • U baahan taageero si uu u bilaabo uuna u sii wado la hadalka bulshada • Waajahaaya dib u dhaca kobaca xirfada waxbarashada iyo wax sababaynta 	<ul style="list-style-type: none"> • Dhibaato ka haysato wax cunista iyo wax liqida • Dhibaato ka haysata in miisaankiisu kordho • Waajahaaya ama khatar ugu jira saxasho ama cunto soo celin • Waajahaaya cunto soo noqonaysa • Qaba dibiro, gaar ahaana marka dhaqdhaqaaqiisa iyo/ ama cuntada ay kooban yihiin.



Carruurnimada Hore (4 ilaa 7) sii socda

Heerka	Kobaca Bulshanimada/ Shucuurta iyo Habdhaqanka	Daryeelka naftiisa iyo Xirfadaha Nolol Maalmeedka
	Cunugaaga ayaa:	Cunugaaga ayaa:
I	<ul style="list-style-type: none"> • Ka warqaba farqiyada u dhexeeya asaga iyo dadka kale • U baahan inuu la joogo daryeeleyaasha inta ugu badan ee suuragalka ah • Dareemaaya inuu ka warqabo naftiisa • Qabista dhibaatooyinka dareemaha • Si fudud u niyad jabaaya shucuur ahaana camal xun • Aan lahayn biseyl bulsho ama jecel inay la joogaan ilmaha kayaryar • U baahan caawimaad ku aadan maareynta habdhaqanka • U baahan taageero si uu u bilaabo uuna u sii wado ku milanka bulshada • Dhibaato ka haysata helista saaxiibo 	<ul style="list-style-type: none"> • Quudinaaya naftiisa inta badan marxaladaha; dhibaatooyin ku qaba marka ay qabsadaan xaalado walwal leh, sida bii'bo uusan garanayn • Iskiis u labisanaaya haddii uu awoodo inuu adeegsado gacmaha inta lagu jiro hawlaha maalin kasta • Wax ka barashada ku celcelinta dhaqdhaqaaqa muhiimka u ah labiska (sida wax ku qabsashada hal gacan iyo ku riixida ama ku jiidista gacanta kale) • Dhaqista gacmaha iyo wajiga, dhaqista jirka, cadayida ilkaha, isticmaalka musqusha, iyo dhaqista • Tirada sii kordhaysa ee shaqada guriga iyo waajibaadka dugsiga iyo dugsiga
II- III	<ul style="list-style-type: none"> • Ka warqaba farqiyada u dhexeeya asaga iyo dadka kale • U baahan inuu la joogo daryeeleyaasha inta ugu badan ee suuragalka ah • Dareemaaya inuu ka warqabo naftiisa • Qabista dhibaatooyinka dareemaha • Si fudud u niyad jabaaya shucuur ahaana camal xun • Aan lahayn biseyl bulsho ama jecel inay la joogaan ilmaha kayaryar • U baahan caawimaad ku aadan maareynta habdhaqanka • U baahan taageero si uu u bilaabo uuna u sii wado ku milanka bulshada • Dhibaato ka haysata helista saaxiibo 	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga xeeladah kale iyo la qabsiyada ama caawimaada ku aadan xirfadaha daryeelka naftiisa • Adeegsiga maacuunta cuntada ee uu yaqaano, asagoo u baahan caawimaad ku aadan jarista ama gurashada cuntada • Wax ka barashada ku dhaqanka xirfadaha labiska ee goobaha kaladuwan • Inuu iskiis u labisto haddii uu awoodo inuu joogteeyo dheelitirka fadhiga iyo xakamaynta qaarka kore • Dhibaato ayuu ku qabaa suunka sida suumanka, jiinyeerada iyo badhannada • U baahan caawimaad ku aadan dhaqista gacmaha iyo wajiga, dhaqista jirka, cadayida ilkaha, isticmaalka musqusha, iyo dhaqista • Tirada sii kordhaysa ee shaqada guriga iyo waajibaadka dugsiga iyo dugsiga asagoo adeegsanaaya dhaqan gelinnada marka loo baahdo
IV- V	<ul style="list-style-type: none"> • Muujinta habdhaqannada qaska badan ee diidmada ah • Ka fogaanshaha dadka kale • Xanaaq degdeg ah, shucuur kacsan, iyo muujinta xirfadaha bulshada oo liita • U baahan taageero si uu u bilaabo uuna u sii wado ku milanka bulshada • Khatar ugu jira habdhaqannada Isdhaawicida ama habdhaqannada camal xumada ah 	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegsiga farsamooyinka dhaqan gelinta si uu cuntada ugu cuno qaado, uu cuntada ugu dhaqaajiyo dhanka afkiisa, ama uu u sameeyo dhaqdhaqaaqyo isku mid ah si uu iskugu dayo inay ka caawiyaan cunista cuntada • Inuu sida ugu fiican u cuno cuntooyinka aadka u dhiiri gelinaaya kuwaaso ay fududahay in la maareeyo (sida cuntooyinka ku dhagaaya qaadada, sida cuntada dulsaarta ah) • Wuxuu adeegsadaa aalada hadalka ama batoonnada si uu ugu sheego daryeeleyaasha noocyada cuntooyinka uu jecel yahay ama ay jeceshahay. • Wuxuu u baahan yahay caawimaad ku aadan adeegsiga faraha si uu ugu cunteeyo • Wuxuu samayn karaa shaqooyinka fudud ee labiska si iskiis ah (sida iska bixinta koofiyada), laakiin wuxuu u baahan yahay dadka kale inta badan shaqooyinka labiska • U baahan caawimaad ku aadan dhaqista gacmaha iyo wajiga, dhaqista jirka, cadayida ilkaha, isticmaalka musqusha, iyo dhaqista • Tirada sii kordhaysa ee shaqada guriga iyo waajibaadka dugsiga iyo dugsiga ayadoo lagu saleynaayo awooda

Shaqooyinka Dareemaha	Dalxiiska iyo Jirdhiska
<p style="text-align: center;">Cunugaaga ayaa:</p>	<p style="text-align: center;">Cunugaaga ayaa:</p>
<ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa wali muhiim ah) • Wuxuu qabaa strabismus, ama dheelidir la'aanta murqaha indhaha, (oo sidoo kale loo yaqaano il caweerada ama il-bisnimada) • Dhibaato ka haysata kobaca hadalka (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) 	<ul style="list-style-type: none"> • Ka qaybgalaaya ciyaarta qiyaasta ah • Blaabaaya wadaagista, samaynta iyo la falgalida carruurta isku da'da ay yihiin • Isticmaalka boonbaleyaasha gacanta, wadista boonbaleyaasha iyo ciyaaraha shaqada • Rablaynta, sinbashada, boodista, tuurista iyo qabashada • Raadinta dookhyada ciyaarta ee bixinaya dareenka madax banaanida • Iskudayga tuurista iyo qabashada waxyaabaha waawayn, ee fudud marka la caawiyo
<ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa wali muhiim ah) • Wuxuu qabaa strabismus, ama dheelidir la'aanta murqaha indhaha, (oo sidoo kale loo yaqaano il caweerada ama il-bisnimada) • Dhibaato ka haysata ku ekaanta iyo isha la raacista wax (naafada wareega araga) • Dhibaato ku qaba fahanka xogta muuqaalka ah marka ay qusayso goobta, tusaale, xujooyinka, qoraalka (naafada waxbarashada muuqaalka) • Dhibaato ka haysata maqlida codadka u dhow (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Dhibaato ka haysata kobaca hadalka (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Waajahaaya dareemaha hooseeya ee gacanta xanuusan, gacanta ama lugya • Waajihida dhibaato ka haysata dareenka caadiga ah, gaar ahaana codadka ama waxyaabaha uu taabto (xanuunka isdhexgalka dareemaha) 	<ul style="list-style-type: none"> • Ka qaybgalaaya ciyaarta qiyaasta ah • Blaabaaya wadaagista, samaynta, la falgalida carruurta isku da'da ay yihiin • Isticmaalka boonbaleyaasha gacanta, wadista boonbaleyaasha iyo ciyaaraha shaqada • Dhibaato ka haysata shaqooyinka u baahan xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud, sida farshaxanka iyo ciyaaraha boorka • Iskudayida rablaynta, sinbashada iyo boodista, laakiin waxaa laga yaabaa inuusan guul buuxda ka gaarin • Raadinta dookhyada ciyaarta ee bixinaya dareenka madax banaanida • Iskudayga tuurista iyo qabashada waxyaabaha waawayn, ee fudud marka la caawiyo
<ul style="list-style-type: none"> • Lahaanshaha maqalka iyo aragga caadiga ah (baaritaan ayaa wali muhiim ah) • Wuxuu qabaa strabismus, ama dheelidir la'aanta murqaha indhaha, (oo sidoo kale loo yaqaano il caweerada ama il-bisnimada) • Dhibaato ka haysata ku ekaanta iyo isha la raacista wax (naafada wareega araga) • Dhibaato ku qaba fahanka xogta muuqaalka ah marka ay qusayso goobta, tusaale, xujooyinka, qoraalka (naafada waxbarashada muuqaalka) • Dhibaato ka haysata maqlida codadka u dhow (baaritaanka maqalka ayaa muhiim ah) • Waajihida dhibaato ka haysata dareenka caadiga ah, gaar ahaana codadka ama waxyaabaha uu taabto (xanuunka isdhexgalka dareemaha) • Qaba naafooyinka waawayn ee dareemaha oo ka haysta araga, maqalka, urka, taabashada, dhadhanka iyo wacyiga • Doorbidaaya inuu eego midabyada qaarkood, dhaqdhaqaaqa ama nalka 	<ul style="list-style-type: none"> • Bilaabista inuu la wadaago, la falgalo, oo dhexgalo carruurta kale • Adeegsiga boonbaleyaasha sababta iyo saamaynta (wax kasta oo sameeya jabaq ama dhaqdhaqaaq ku saleysan ficilka ilmaha)

Carruurnimada Hore (4 ilaa 7) sii socda

Heerka	Qiimeynada iyo Baaritaannada	Caawimaadaha	Kooxdaada Daryeelka Adeeg bixiyaasha muhiimka ah waxaa lagu qoray far waawayn
	Kooxdaada daryeelka ayaa ku talin karta:	Kooxdaada daryeelka ayaa ku talin karta:	
IV- V	<ul style="list-style-type: none"> Baaritaannada joogtada ah ee dhaqdhaqaaqa, hadalka iyo xirfadaha Dhaqdhaqaaqa lafaha (xaalada shaqo) Raajada sinaha oo lagu qaato 8 ilaa 10 sano da'da iyo 6 ilaa 12 bilood kasta mar ilaa qalfoofku ka qaangaaro Raajada laf dhabarta Baaritaanka aragga, maqalka, kobaca, nafaqada, caafimaadka lafaha, saxarada, kaadi haysta, hurdada, wax liqida iyo xanuunka Baaritaanka shaqada iyo adkaanta murqaha U gudbinta caafimaadka nafsiga/neerfaha dhimirka si looga baaro dhibaatooyinka waxbarashada ama habdhaqanka Balamaha lala yeesho dhakhaatiirta muhiimka ah 6 ilaa 12 bilood kasta si loola socdo loona baaro kobaca La kulmida shaqaalaha bulshada si loo siiyo taageerada iyo khayraadka Ka hadalka u wareegida daryeelka qof wayn Qorsheyta guriyaynta, shaqada, badqabka, xiriirada iyo dhismaha xirfada shaqada bulshada Wuxuu u baahan karaa VFSS ama FEES sii loo baaro badqabka liqista cuntada uu afka ka qaato 	<ul style="list-style-type: none"> Daawo lagu yareynaayo adkaanta/tigtignaanta, sida botulinum toxin ama phenol Maareynta xanuunnada la xiriira, sida suuxinta ama ADHD Baxnaaninta jirka, shaqada, hadalka iyo luuqada Bamka Intrathecal baclofen si loo yareeyo qalayfka Qaliinka afaha si loo saxo ciladaha lafaha Sixitaanka ciladaha soo noqnoqda sabab la xiriirta dib u dhaca kobaca Agabka socodka si loo ilaaliyo toosnaanta loona siiyo xasilooni kala-goyska La shaqeynta degmada dugsigaaga Taageerada noloshu ilmaha inta lagu baaritaannada iyo baxnaaninta Fadhiga iyo dhaqdhaqaaqa la fududeeyay (tababaraha socodka, aalada lagu istaago, kursiga gaariga ama gaari curyaanka la riixo ama korontada ah) Isbadelada lagu sameeyo goobta guriga ama dugsiga cunugaaga Aaladaha badelka ah ee caawimaada ama qaababka Qalabka, daawooyinka ama isbadellada si loo yareeyo damaca, xalinta dhibaatooyinka wax liqista, xakamaynta calyada, iwm. 	

Liiska erayada

Liisnaan erayada ayaa kaa caawinaaya inaad si fiican u fahanto shuruudaha quseeya xanuunka cunugaaga. Marka erayada ku qoran qeexitaannadu ay far yaryar ku qoran yihiin, erayadaas waxaa lagu qeexay meel kale oo liiska kamid ah.

Adkaanta – Adkaanta dheeriga ah ee murqaha (jawrarka) iyo heerarka badan ee murqo kogista aan oo qasdin (jawrarka joogtada ah ee murqaha ama dhaqdhaqaaqa soo boodada ah) kuwaasoo keena in qofku dhaqaaqi waayo.

Adkaanta – Jawrarka aadka u daran ee murqaha ee qayb kasta, marka lagu daro dhaqdhaqaaqa aadka u xadidan; adkaanta murqaha ayaa ka jirta dhamaan heerka dhaqaaqa.

Afka hore ee cagta – Qaybta hore ee cagta.

Angaga – Adkaanta ama qalayfka murqaha.

Arax qalooca – Waa qaabka kala qaloocashada laf dhabarta marka laga eego dhanka danbe ama hore.

Awooda Murqaha – Awooda xooga ama difaaca murqaha.

Baaritaanka kala goysyada – Adeegsiga kumbuyuutarka si loo cabiro dhaqdhaqaaqa kala goyska, soo saarida awooda, shaqada murqaha iyo mararka qaar awooda lagu bixiyo marka qofku soconaayo.

Baaritaanka Liqista ee VFSS Videofluoroscopic - VFSS waa baaritaanka raajada, oo sidoo kale la yiraahdo baaritaanka wax liqista ee barium, kaasoo loo adeegsado baarista wax liqista. Inta lagu jiro baaritaanka, baxnaaniyaha hadalka-luuqada (SLP) ayaa baari doona afka iyo dhuunta inta qofku wax liqaayo.

Baaritaanka Wax Liqida ee Raajada Dhuunta ee FEES - Baaritaanka FEES waa baaritaan loo adeegsado baarista ficilada wax liqida. Inta lagu jiro baaritaanka, dhakhtarka hadalka-luuqada (speech-language pathologist, SLP) ayaa geliya tuubo aad dhuuban, oo jilicsan sanko si uu u baaro qaybaha dhuunta inta qofku wax liqaayo.

Bamka Intrathecal baclofen – Aalad qaliin ahaan loo gasho maqaarka hoostiisa si loogu baahiyo baclofen ku milmaya dareeraha ku jira aaga laf dhabarta (oo loo yaqaano aaga intrathecal) si loo yareeyo adkaanta murqaha. Haddii tuubo la gasho maskaxda bukaanka, baclofen ayaa lagu firdhiyaa aaga dheecaanku ka buuxo oo ah cirbad.

Barnaamijka Waxbarasha Gaarka ah (Individualized Education Program, IEP) – Qorshaha qoran oo qeexaaya noocyada adeegyada dugsiiga maxaliga ah damaanad qaaday inuu bixinaayo.

Bawdada (laf boodada) – Lafta dheer, ee culus ee lawga ku xidha sinta.

Bawdo qalooc – Leexinta bawdada ama afta lugta midkood horay ama gudaha, taasoo dhacda inta qofku koraayo.

Baxnaaninada Jirka – Qiimeynta iyo daawaynta loogu talo galay inay ka caawiso dadka xirfadah dhaqdhaqaaqa, awooda iyo dheelitirka. Dhakhaatiirta ayaa sidoo kale ku taliya, abuura oo adeegsada qalabka caawimaada, sida gaari curyaannada korontada ama la riixo, aaladaha socodka, iyo aaladaha istaaga.

Baxnaaninta Hadalka iyo Luuqada – Adeegyada diirada saaraaya kor u qaadista xirfadaha hadalka iyo luuqada, sida kor u qaadista awoodaha hadalka dhaqdhaqaaqa (wax liqida).

Cabirka Dhaqaaqa (ROM) – Heerka dhaqdhaqaaqa ka jira kala-goyska.

Caga qalooca – Qalooc dhexda cagtu ay kor u tuusanto; waxaa caadiyan la socda qalooca anqawga—oo ah nooc cilad ciribtu gudaha u qaloocan tahay.

Cago jiidka – Ku socoshada cagta ayagoo faraha cagtu hooseeyaan.

Cago jiidka (caga dhaca) – Eray si guud loogu qeexo awoodid la'aanta kor u qaadista cagta marka aad soconayso; dadka xanuunka qaba ayaa caarada hore ee cagta dhulka ku jiidka kara marka ay soconayaan.

Caweerada – Jiritaan la'aanta milicsiga isha, oo keena caweerada ama il dabista.

Cilada maskaxda – Xanuun ilmuhu qabo marka uu dhasho ama kahor

Ciribta – Qaybaha danbe ee cagta.

Cunto soo celinta – Waa xanuun cuntada caloosha gashay ku soo laabato dhuunta iyo mararka qaar afka.

Daawada neerfaha – Daawada soo saarta isbadellada qaabka nidaamka neerfuhu u shaqeeyo.

Dacifnimada – Awoodis la'aanta heerka awooda murqaha qofku leeyihiin sida laga filaayo qofka jirkiisu caafimaad qabo.

Dareemaha – La xiriira taabashada ama dareenka taabashada.

Dhaqaaqa afka – La xiriira dhaqdhaqaaqa murqaha gudaha iyo aaga afka.

Dhaqaaqa bawdada (laf boodada) – Dhaqaaqa gudaha ee bawdada si lawga iyo cagtu u soo laabmaan.

Dhaqaaqa neerfaha – Oo quseeya labadab neerfaha iyo murqaha.

Dhaqdhaqaaqa guud – La xiriirta isticmaalka murqaha waawayn ee jirka, sida kuwa lugaha, gacmaha iyo caloosha.

Dhaqdhaqaaqa jirka – La xiriirta isticmaalka murqaha yaryar ee jirka, sida kuwa wajiga, gacmaha, faraha, cagaha iyo faraha cagaha.

Dhexda cagta – Dhexda cagta.

Dib u dhaca dhaqdhaqaaqa – Kobaca ka hooseeya sidii caadiga ahayd ee xirfadaha dhaqdhaqaaqa.

Gasarka – Nooc socodka kamid ah oo la xiriira qaabka soo godashada ee ka dhaca sinta, lawga, iyo kala goysyada anqawga (cumaacunta lugta); waxay ku adkaynaysaa ilmaha inuu kor u istaago.

Guusha kobaca – Yoolka kobaca, sida fariisiga ama adeegsiga weedhaha labada eray ah, kuwaasoo dhakhaatiirtu u adeegsadaan cabirka hormarka kobaca wakhti kadib.

Hadalka ishaarada ah – Adeegsiga farsamooyinka aan hadalka ahayn, sida ishaarooyinka, hambariirsiga, ama sawirada, si ay hadalka u badelaan.

Isbadelka habdhaqanka – Sheeyga muuqda ama dhacdada bii'ada oo saamayn kara habdhaqanka.

Iskaanka KumBuyuutarka Loo Adeegsado (computerized axial tomography, CT) – Baaritaanka raajada oo adeegsada kumbuyuutar si uu iskugu dhafo sawirada badan ee Raajada, kaasoo abuuraya muuqaalka xagalaha badan iyo sawirka sadexda jiho leh ee gudaha jirka.

Iskaanka Magneedka Loo adeegsado (Magnetic resonance imaging (MRI) – Aalad caafimaad oo loo adeegsanaayo in lagu eego faahfaahinta qaab dhismeedyada gudaha jirka.

Isku dhafka Dareemaha – Awooda nidaamka dhexe ee neerfaha si looga shaqeeyo loogana barto dareemayaasha sida araga, taabashada, jabaqda, urka, dhadhaqanka iyo dhaqaaqa.

Iskuxirka iyo Isku dheelitirka naafada ah – Carqalad ku dhacda jawaabaha nidaamka dhexe iyo farsamooyinka ka dhasha waxyeelada ku dhacda nidaamka dhexe ee neerfaha.

Jawrar – Koombida dabaca murqaha, kaasoo keenaaya inuu xayirmo dhaq-dhaqaaqu.

Jawrarka – kacsanaanta ama adkaanta dheeriga ah ee murqaha (kogsanaan).

Jeex qalal – Waa nooc kamid ah xanuunka qalalka kaasoo midkood dhanka midig ama bidix ee jirku naafoobo; wajiga ama qaarka kore ayay saamayn gaari kartaa iyana.

Jiir dhaca – Marka qayb kamid ah jirku hoos u noqoto.

Kala baxa – Kala baxa qaybta ah ee kala-goyska.

Kala baxa sinta – Waxay dhacdaa marka madaxa bawdada (laf boodada) ay ka baxdo godkeeda sinta.

Kala jeexa jirka – Laynka indho ka cabirka ah ee kala bara jirka, kaasoo kala saara midig iyo bidix.

Kobaca – Hormarka kobaca iyo waxbarashada kaasoo inta lagu jiro qofku uu yeesho xirfado iyo awoodo.

Kogista – Soo kogista markaas ama gaabiska murqaha.

Ku hadalka luuqada – Awooda adeegsiga ishaarooyinka, erayada iyo astaamaha qoran si aad u hadasho.

Kyphosis – Naafada dhabarka (hunchback) ee laf dhabarta sare.

Laabista lafaha – Dhaqdhaqaaqinta kala-goysyada.

Labaca – Jileeca murqaha (labaca).

Labada Dhinac – Quseeya labada jeex ee jirka.

Laclac – Qaabka iyo dhaqdhaqaaqa laclaca noqda.

Laclaca – Hoos u dhaca awooda murqaha.

Laclaca – Waa xanuun waxyeelada ku dhacda maskaxdu keenayso in qofka socodku ka halaabo (lawlaw); wuxuu saamayn karaa dhaqdhaqaaqa, hadalka, milicsiga isha iyo awooda wax liqida.

Lafaha – Quseeya lafaha, kala goysyada ama murqaha.

Lafo maroorka – Wareegga aan fiicnayn ee lafta taasoo badesha qaabka muruquhu ugu xiran yihiin.

Lafo toosin – Qaliinka jarista iyo dib u qaabaynta lafaha.

Lawlawga – Qabista dhaqdhaqaaqyada wax qorista oo aan la xakamayn karin kana dhashay dhaawaca maskaxda.

Lug tigtiganka – Lugta oo horay u tigtiganta.

Lugo isdhaaf – Isdhaafka lugaha marka qofku taagan yahay ama kor loo hayo; lugaha ayaa u muuqda inay isdhaafsan yihiin qaabka sida maqasku u dhaqaaqo marka qofku soconaayo.

Lugo qalalka – Ku socoshada faraha cagaha sabab la xiriirta in murqaha dhudhunku soo kageen ama jawraren.

Lugo qalalka – Nooc kamid ah xanuunka qalalka kaasoo tigtignaantu badanaa ka jirto lugaha.

Luminta xakamaynta dhaqdhaqaaqa gaarka ah – Carqaladeynta wakhtiga, darnaanta, mudada iyo isku xirka ikhtiyaariga ah ee xakamaynta murqaha.

Murgacashada sinta – Kala baxa buuxa ama qaybta ah ee kala-goyska sinta.

Murqo xajiye – Aaladaha fudud, laga sameeyay caaga, baalka ama dhimirka, taasoo siinaysa xasiloonaada kala-goysyada ama sida adag u kala jiidaaya murqaha.

Murqo xiranka (Lever arm dysfunction, LAD) – Naafada lafta oo ka hor istaagaysa murqaha dhaafsan ama ku xiran lafta inay si caadi ah u shaqeeyaan.

Muruq boodo – Murqo jawrararka joogtada ah ee sababa dhaqdhaqaaqa gaabiska ah, ee taxanaha ah ee qaloocashada ama qaab dhismeedka khariban.

Naafada – Hoos u dhaca awooda, shaqada ama tayada adeegsiga lugta, gacanta ama qayb kale oo jirka ah.

Naafada garaadka – Dhibaato ka jirta awooda qofka ee fahanka iyo/ama waxbarashada.

Naafada kobaca – Waa naafo bilaabata kahor da'da 18 ayna u badan tahay inay abidkeed jirto abuurtana naafo wayn.

Naafada qaybta – Cilada saamaysay labada lugood iyo hal gacan.

Naafada waxbarashada – Dhibaato ka jirta fahanka xogta midkood ama ka badan aagaga tacliinta (akhriska, wax qorista iyo xisaabta), taasoo carqalad ku ah shaqada dugsiga ama shaqooyinka maalin kasta ee u baahan akhriska, wax qorista, iyo xirfadaha xisaabta.

Naafo dhanka araga – Indhoolnimada buuxda ama qaybta ah ee ka dhalata dhaawaca nidaamka dhexe ee araga maskaxda; inkastoo indhaha heli karaan xogta muuqata, maskaxda ayaan fahmi karin aana turjumi karin xogta.

Naafooyinka Waxbarashada ee Araga – Awoodid la'aanta fahanka waxa qofku u jeedo; dhibaato dhanka aqoonsiga qaababka kaladuwan ee sida xarfaha/lambarada, xasuusashada qaybaha muuqaalka, iyo abaabulida walxaha meesha yaala (sida fahanka qariirada).

Neerfo jarista (magaca buuxa: dorsal rhizotomy gaarka ah) – Qaliinka neerfaha oo quseeya jarista neerfayaasha qaar ee laf dhabarta si loo yareeyo adkaanta kooxaha murqaha.

Neerfo jarista gaarka ah – Eeg Rhizotomy.

Nidaamka Kala sooca Awooda ee Macmalka ah (MACS) – Hal qaab oo dhakhaatiirtu uga hadlaan sida dadka qaba xanuunka qalalka u adeegsadaa gacmahooda maamulka walxaha ku jira shaqooyinka maalin kasta.

Pes valgus – Qaab darada cagaha kuwaasoo cagtu siman tahay ciribtuna u leexsan tahay gudaha.

Qaabka – Qaabka ama jooga jirka.

Qaarka hoose – Lugaha.

Qaarka kore – Gacmaha.

Qalooca lafaha – Cilada ka jirta lafaha, oo badanaa ka timaada cadaadiska murqaha aan dheelitirnayn ee jirka koraaya.

Qalooca lugaha – Fadhiga qaabka lugta qofku abuurayso qaabka "W" marka ay dhulka taalo (qalooca lawga, lugaha oo kala wareegsan kana sii jeeda jirka).

Qalooca lugaha – Socodka luguhu soo qaloocdeen (gudaha u leexsameen).

Qalooca wajiga – Ku dhacda qalfoofka maskaxda iyo lafaha wajiga.

Qaybaha dhaqdhaqaaqa – Qaababka jirka iyo dhudhumadu u wada shaqeeyaan si u sameeyaan dhaqdhaqaaqa xiga.

Qiimeynta (ama baaritaanka) – Hawsha lagu go'aansho awoodaha iyo daciifyada ilmaha; ayna ku jiraan baaritaanka iyo kormeerada ay sameeyaan koox khabaro ah.

Quadriplegia – Nooca xanuunka qalalka oo jirka dhan saameeya.

Saan qaad – Gadaal u dhaqaajinta lugta ama gacanta

Saan qaad – Horay u dhaqaajinta lugta ama gacanta

Salka maskaxda – Waa qaybta maskaxda ee kala qaybisa cerebellum iyo laf dhabarta.

Saxashada - Gelitaanka cabitaanka ama cuntada gasha marinka neefta

Suuxida – Xanuun soo noqnoqda oo maasooyinka korontada ee khariban ee maskaxda ay abuuraa suuxdin.

Suuxinta – Dhaqdhaqaaqa aan la Xakameyn karin ama isbadellada ku dhaqa miyirka ama habdhaqanka ka dhasha qaraca khaldan ee shaqada korontada maskaxda.

Tignooloojiyada Kaalmaatiga ah – Qalabka, sida kuwa lagu socdo iyo ulaha lagu boodo, loo adeegsado taageerida daciifnimada amadheelitirka si loo fuliyo hawl gaar ah, sida socodka.

Xajiyaasha anqawga cagta (Ankle foot orthosis, AFO) – Xajiye ku xiran anqawga xoogaana ka sareeya cagta; waxaa loo adeegsadaa xakamaynta booska iyo dhaqdhaqaaqa anqawga, wuxuu xoojiyaa daciifnimada ama saxaa ciladaha.

Xajiyaha cagta – Waa xajiye taageera cagta laakiin aan gaarayn ilaa anqawga.

Xajiyaha cagta iyo anqawga (Knee ankle foot orthosis, KAFO) – Xajiyaha dheer ee cagta oo ka samaysan balaastig fudud, oo leh suun lagu soo xiraayo kala goyska lawga, kaasoo taageeraaya lugta oo dhan.

Xakamaynta dhaqaaqa ee gaarka ah – Awooda maskaxda ee xakamaynta si gaar ah iyo nidaaminta murqaha inta lagu jiro shaqooyinka sida socodka, orodka iyo laacista sheey.


Xanuunka isku dhafka dareemeyaasha – Nidaamka dhexe ee neerfaha ayaa dhib ku qaba maareynta xogta uga timaada dareemeyaasha (araga, taabashada, jabaqda, urka, dhadhanka iyo dhaqdhaqaaqa).

Xanuunka qalalka – Xanuunka dhaqdhaqaaqa iyo qaab dhismeedka oo ka dhasha dhaawac abadiyan ah oo ku dhaca maskaxda.

Xiska – Qaybta maskaxda ee isku xirta shaqada murqaha iyo xakamaynta dheelitirka.

Nidaamyada Kala Sooca Shaqada Dhaqdhaqaaqa guud (GMFCS)


I



Wuu socdaa bilaa xadidaad.

- Wuxuu ku socdaa guriga, dugsiga, banaanka iyo deegaanka.
- Wuxuu koraa jaranjarooyinka asagoo deegsanaaya geesaha la cuskado.
- Wuxuu sameeyaa xirfadaha sida orodka iyo boodista, laakiin malahan xawaare, dheelitir iyo isku xirnaan.

II



Wuu socdaa asagoo leh xadidaado.

- Wuu ku socdaa inta badan goobaha.
- Wuxuu koraa jaran-jarooyinka asagoo cuskanaaya geesaha jaran-jarta.
- Dhib ayaa ka haysta socodka badka dheer iyo isku dheelitirka meelaha aan sinayn, meelaha taaga ah, meelaha saxmada leh ama meelaha qarsoon.
- Wuu socdaa marka la siiyo caawimaad jireed, asagoo adeegsanaaya aalada socodka ama socodka gaari curyaanka badadka dhaadheer.
- Wuxuu leeyahay awooda ugu yar ee fulinta xirfadaha sida orodka iyo boodista.

III



Wuxuu socdaa asagoo adeegsanaaya aalada socodka ee gacanta.

- Wuxuu socdaa asagoo haysta aalada socodka inta badan gudaha meelaha iyo badadka gaaban.
- Wuxuu koraa jaran-jarooyinka asagoo cuskanaaya geesaha jaran-jarta lana kormeeraayo ama caawinaayo.
- Wuxuu adeegsadaa gaari curyaanka marka uu ku safraayo bad dheer.
- Wuxuu adeegsadaa gacamaha iyo calaalaha, ama cagaha si uu u riixo taayirada gaari curyaanka (la riixo) badadka gaaban.

IV



Iskiis ayuu u socdaa asagoo leh xadidaado; wuxuu adeegsan karaa gaari curyaanka korontada ah.

- Wuxuu u baahan yahay caawimaad jireed ama gaari curyaanka korontada inta badan goobaha.
- Wuxuu socdaa badka gaaban ee guriga marka la siiyo caawimaad jireed ama wuxuu adeegsadaa dhaqdhaqaaqa korontada ama aalada socodka taageerada jirka.
- Wuxuu adeegsadaa gaari curyaanka la riixo ama aalada socodka korontada ku shaqeysa markuu joogo dugsiga, banaanka iyo deegaanka.

V



Wuxuu u baahan yahay in lagu riixo gaari curyaanka.

- Wuxuu u baahan yahay in lagu riixo gaari curyaanka markasta.
- Dhibaato ayaa ka haysata xakamaynta madaxa iyo qaarka kore inta badan boosaska.
- Awood badan uma lahan xakamaynta dhaqaaqa lugta iyo gacanta.

Nidaamka Kala Sooca Awooda ee Macmaulka ah (Mini-MACS) Da'aha 1-4

Heerka I: Wuxuu si fudud oo guul leh u maamulaa alaabta.

Ilmaha ayaa qabi kara xadidaad yar oo ku aadan qabashada shaqooyinka u baahan fiirada gaarka ah iyo isku xirka gacmaha laakiin wali wuu qaban karaa. Ilmaha ayaa u baahan kara caawimaada qof wayn marka uu maamulaayo alaabaha marka loo eego ilmaha faciiis ah.

Heerka II: Wuxuu maareeyaa inta badan agabka, laakiin xoogaa waxaa hooseeya tayada iyo/xawaaraha shaqada.

Talaabooyinka qaarkood waxay keliya qaban karaan oo dhameystiri karan marka dhib ka qabsato iyo kadib ku celcelin. Ilmaha ayaa iskudayi kara qaab kale, sida adeegsiga keliya hal gacan. Ilmaha ayaa u baahan caawimaada qof wayn si uu maamulo walxaha si joogto ah marka loo eego carruurta isku da'da yihiin.

Heerka III: Wuxuu ku maamulaa alaabaha asagoo dhib ku qaba.

Dedaalku waa mid liita, lehna heerarka iyo tayada xadidan. Alaabaha ay fududahay in la maareeyo ayay si madax banaan ugu qabtaan muddo kooban. Ilmaha ayaa badanaa u baahan qof wayn oo caawimaad iyo taageero siiya si uu hawsha u qabto.

Heerka IV: Waxay maamulaan qaybta gaarka ah ee agabka fudud oo u baahan ficilo fudud.

Talaabooyinka ayay u qabtaan si gaabis ah, oo leh cadaadis iyo/ama gaarnimo aan soocnayn. Ilmaha ayaa markasta u baahan qof wayn oo caawimaad iyo taageero siiya si uu hawsha u qabto.

Heerka V: Ma qabtaan waxyaabaha awoodooduna aad ayay u kooban tahay mana qaban karaa shaqooyinka fudud.

Sida ugu haboon, ilmaha ayaa riixi kara, taaban kara, gujin kara, ama qaban kara dhawr sheey, asagoo si joogto ah uu u caawinaayo qof wayn.

Farqiga u dhexeeya Heerarka I iyo II:

Ilmaha ku jira Heerka I ayaa dhibaato kooban ku qabi kara maamulka agabka u baahan kara xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud marka loo eego ilmaha aan naafooyinka qabin ee asaagood ah.

Carruurta Heerka II ayaa qaban kara caadiyan isla walxaha ilmaha Heerka I, laakiin waxaa dhibaato ka qabsataa qabashada shaqooyinka iyo/ama waxay ku qaataan wakhti dheeri ah inay sameeyaan, taasoo keentay inay badanaa caawimaad codsadaan. Farqiyada shaqada ee u dhexaysa gacmaha ayaa keeni kara in shaqadu ka hoos marto heerkii la rabay. Waxay u baahan karaan tusmo iyo farsamo dheeri ah si ay u bartaan sida loo maareeyo walxaha marka loo eego ilmaha Heerka I.

Farqiga u dhexeeya Heerarka I iyo III:

Carruurta heerka II ayaa maamuli kara inta badan walxaha, inkastoo ay ku qaadan karto wakhti dheer ayna tayadoodu qaar hoosayso, waxayna u baahan karaan tusmo iyo ku celcelin badan si ay u bartaan sida agabka loo maamulo.

Carruurta Heerka III ayaa maamula inay adeegsadaa agabka fudud laakiin badanaa waxay u baahan yihiin caawimaad ku aadan dhigista agabka meel fudud oo hortooda ah. Waxay sameeyaan talaabooyinka oob qaybo yaryar loo qaybshay. Dedaalku waa mid hooseeya.

Farqiga u dhexeeya Heerarka III iyo IV:

Carruurta heerka III ayaa maareeya adeegsiga waxyaabaha fudud si madax aanaan muddooyin kooban. Waxay qabtaan shaqooyinka marka qaybo yaryar laga dhigo, talaabooyinka ayaana qaata muddo dheer.

Sida ugu fiican, carruurta Heerka IV ayaa qaban kara shaqooyinka fudud sida qabashada iyo siidaynta agabka fudud in la qabto kuwaasoo lagu siiyo meel dagan. Waxay u baahan yihiin caawimaad joogto ah.

Farqiga u dhexeeya Heerarka IV iyo V:

Carruurta Heerka IV waxay qabtaan shaqooyin gaar ah oo leh xadidaad aad u kooban waxayna u baahan yihiin caawimaad joogto ah,

Ugu badnaan, carruurta Heerka V ayaa qaban kara dhaqdhaqaaqa fudud ee xaaladaha gaarka ah. Waxay riixi karaan batoon fudud ama qaban karaan sheey keli ah, oo fudud.

Nidaamka Kala Sooca Awooda ee Macmaulka ah (MACS) Da'aha 4-18

Heerka I: Wuxuu si fudud oo guul leh u maamulaa alaabta.

Inta badan, xadidaadaha qabashada fudud ee shaqooyinka caadiga ah ee u baahan xawaaraha iyo saxnaanta. Hase yeeshee, xadidaado kasta oo ka jira awoodaha caadiga ah ayaan xanibayn madax banaanida shaqooyinka maalinlaha ah.

Heerka II: Wuxuu maareeyaa inta badan agabka, laakiin xoogaa waxaa hooseeya tayada iyo/xawaaraha shaqada.

Shaqooyinka qaarkood ayay iska ilaalin karaan ama ay ku samayn karaan ayagoo ku dhibtooday; qaabab kale oo shaqo ayay adeegsan karaan laakiin awoodaha caadiga ah ayaan caadiyan carqalad ku ahayn madax banaanida hawl maalmeedka.

Heerka III: Wuxuu ku maamulaa alaabaha asagoo dhib ku qaba; wuxuu u baahan yahay caawimaad si uu u diyaarsho iyo/ ama wax uga badelo shaqooyinka.

Dedaalka ayaa hooseeya waxaana lagu gaaraa guul xadidan marka loo eego tayada iyo cadadka. Shaqooyinka ayaa lagu sameeyaa si madax banaan haddii uu ilmuhu diyaarsan yahay ama la qabsado.

Heerka IV: Waxay maamulaan qaybta gaarka ah ee agabka fudud oo lagu siiyo xaalado ay yaqaanaan.

Wuxuu ku qabtaa qaybaha shaqada dedaal iyo guul kooban. Wuxuu u baahan yahay taageero joogto ah iyo caawimaad iyo/ama qalab uu yaqaano, si uu xataa qayb uun shaqada uga guul gaaro

Heerka V: Ma qabtaan waxyaabaha awoodooduna aad ayay u kooban tahay mana qaban karaa shaqooyinka fudud.

Wuxuu u baahan yahay caawimaad buuxda.

Farqiga u dhexeeya Heerarka I iyo II:

Ilmaha Heerka I ayaa lahaan kara xadidaado maamulida walxaha aadka u yaryar, aad u culus ama jajaban kuwaasoo u baahan xakamaynta qaaska ah ee dhaqdhaqaaqa, ama isku xirka saxda ah ee gacmaha. Xadidaadaha ayaa sidoo kale qusayn kara dedaalka xaaladaha cusub ee aysan aqoon. Ilmaha Heerka II ayaa qaban kara ku dhawaad isla shaqooyinka ilmaha Heerka I laakiin tayada shaqada ayaa ka liidata, ama shaqada ayaa ka gaabis badan. Farqiyada shaqo ee u dhexeeya gacmaha ayaa xadidi kara waxtarka shaqada. Ilmaha Heerka II ayaa caadiyan iskudaya inay fududeeyaan qabashada shaqooyinka, tusaale ayagoo adeegsanaaya goob taageeraysa badelkii ay walxaha ku qaban lahaayeen labada gacmood ba.

Farqiga u dhexeeya Heerarka I iyo III:

Carruurta Heerka II ayaa qabta inta badan hawlaha, inkastoo ay u qabtaan si gaabis ah ama tayo ka liidata kuwa kale. Ilmaha ku jira Heerka III ayaa caadiyan u baahan caawimaad si ay u diyaarshaan shaqada iyo/ama u baahan isbadello lagu sameeyo goobta maadaama awoodooda laacista ama maamulida alaabtu xadidan tahay. Ma qaban karaan shaqooyinka qaarkood iyo heerkooda madax banaanida ayaa la xiriira taageerada qaabka goobta.

Farqiga u dhexeeya Heerarka III iyo IV:

Ilmaha Heerka III ayaa qaban kara shaqooyin gaar ah haddii xaalada horay loo maareeyo iyo haddii la kormeero lana siiyo wakhti ku filan. Carruurta Heerka IV ayaa u baahan caawimaad joogto ah inta lagu jiro shaqada waxayna sida ugu haboon uga qaybgeli karaan si macno leh keliya qaybo kamid ah shaqada.

Farqiga u dhexeeya Heerarka IV iyo V:


Carruurta Heerka IV ayaa qabta qayb kamid ah shaqada, hase yeeshee, waxay u baahan karaan caawimaad joogto ah. Carruurta ku jira Heerka V ayaa sida ugu haboon ka qaybgeli kara dhaqdhaqaaq fudud marxalado qaas ah, tusaale riixista batoon ama mararka qaar inay qabtaan walxaha fudud.

Eliasson AC, Krumlinde Sundholm L, Rösblad B, Beckung E, Arner M, Öhrvall AM, Rosenbaum P. The Manual Ability Classification System (MACS) for children with cerebral palsy: scale development and evidence of validity and reliability. *Developmental Medicine and Child Neurology* 2006, updated 2010.

Nidaamka Kala Sooca Shaqada Hadalka (CFCS)

Heerka I - Diraha iyo Helaha Waxtarka ah ee leh Iskaashatada la yaqaan iyo kan aan la aqoon.


Qofka ayaa si madax banaan u kala badelaaya doorarka diraha iyo helaha inta badan dadka jooga inta badan goobaha. Wada hadalka ayaa u dhacaaya si fudud si raaxo leh labadaba qofka la hadlaaya ee uu yaqaano iyo kan uusan aqoon ba. Fahanka khaldan ee wada hadalka ayaa si degdeg ah loo saxaa carqaladna kuma ahan waxtarka guud ee hadalka qofka.



Farqiga u dhexeeya Heerka I iyo Heerka II waa xawaaraha wada hadalka. Heerka I, qofka ayaa si raaxo leh u hadlaaya asagoo aan lahayn ama ay ku yar tahay dib u dhaca si uu u fahmo, u abuurto fariin, ama u saxo khalad. Heerka II, qofka ayaa u baahan wakhti dheeri ah ugu yaraan mararka qaar.

Heerka II - Diraha iyo Helaha Waxtarka ah ee leh laakiin gaabiska


ahIskaashatada la yaqaan iyo/ama kan aan la aqoon. Qofka ayaa si madax banaan u kala badelaaya doorarka diraha iyo helaha inta badan dadka jooga inta badan goobaha, laakiin xawaraha hadalka ayaa gaabis ah wuxuuna carqalad ku yahay wada hadalka. Qofka ayaa u baahan kara wakhti dheeri ah si uu u fahmo fariimaha, u abuurto fariimaha, iyo/ama u saxo khaladaadka. Fahanka khaldan ee wada hadalka ayaa si badanaa ah loo saxaa carqaladna kuma ahan waxtarka hadhoow kusoo kordhin doonaa ee hadalka qofka ee dadka uu yaqaano iyo kuwa uusan aqoon labadaba.



Farqiga u dhexeeya Heerarka II iyo III ayaa quseeya badka iyo nooca dadka wada sheekaysanaaya. Heerka II, qofka ayaa ah diraha iyo helaha saxda ah oo leh dadka la sheekaysanaaya, laakiin xawaaraha ayaa cilad ka jirtaa. Heerka III, qofka ayaa si joogto ah waxtar u leh marka uu yaqaano dadka uu la hadlaayo, laakiin aan ku fiicnayn la hadalka dadka uusan aqoon.

Heerka III - Diraha iyo Helaha Waxtarka ah ee leh Iskaashatada la yaqaan.

Qofka ayaa isku badelaaya diraha iyo helaha fariinta marka uu la hadlaayo qof uu yaqaano (laakiin maaha qof uusan aqoon) inta badan goobaha. Wada hadalka ayaa si joogto ah waxtar u lahayn marka uu la hadlaayo inta badan dadka uusan aqoon, laakiin caadiyan ku fiican dadka uu yaqaano.



Farqiga u dhexeeya Heerarka III iyo IV waa sida joogtada ah ee qofku iskugu badelo doorarka diraha iyo helaha ee dadka uu yaqaano. Heerka III, qofka ayaa caadiyan awooda inuu la hadlo dadka uu yaqaano asagoo qaadanaaya doorarka diraha iyo helaha. Heerka IV, qofka ayaan si sax ah ula sheekaysan karin qofka uu yaqaano. Ciladaan ayaa ka jiri karta fariin gudbinta iyo/ama helista.

Heerka IV - Doorka aan Fadhin ee Diraha iyo Helaha marka uu la hadlaayo dad uu yaqaano.

Qofka ayaan si joogto ah iskugu badeli karin doorarka diraha iyo helaha. Nooca kala duwanaanta ayaan lagu arki karaa noocyada kaladuwan ee dadka wada hadlaaya ayna ku jiraan: a) mararka qaar ah dire iyo hele waxtar leh; b) dire wanaagsan laakiin aan lahayn tayo helida fariinta; c) aan fariinta sifiican u diri karin laakiin si fiican u fahmaaya. Wada hadalka ayaa mararka qaar ku haboon dadka uu yaqaano.




Farqiga u dhexeeya Heerarka IV iyo V waa heerka darnaanta dhibaata qofku ku qabo marka uu la hadlaayo dadka uu yaqaano. Heerka IV, qofka ayaa qayb ahaan awooda inuu noqdo diraha iyo/ama helaha fariinta marka uu la hadlaayo qof uu yaqaano. Heerka V, qofka ayay adag tahay inuu awoodo inuu si quman u hadlo, xataa dadka uu yaqaano.

Heerka V - Diraha iyo Helaha Fariinta oo aad Dhif u ah inuu waxtar yeesho marka uu la hadlaayo dadka uu yaqaano.

Qofka ayaan lahayn tayo muuqata oo uu fariin ku gudbiyo uuna ku helo. Hadalka qofku waa mid ku adag inta badan dadka inay fahmaan. Qofka ayaa u muuqda inuusan fahan fiican ka haysan fariimaha ka imaanaaya inta badan dadka. Wada hadalka ayay adag tahay in la fahmo xataa dadka uu yaqaano.



Jaajusta Aqoonsiga Heerka CFCS



Hidecker, M.J.C., Paneth, N., Rosenbaum, P.L., Kent, R.D., Lillie, J., Eulenberg, J.B., Chester, K., Johnson, B., Michalsen, L., Evatt, M., & Taylor, K. (2011). Developing and validating the Communication Function Classification System (CFCS) for individuals with cerebral palsy, *Developmental Medicine and Child Neurology*. 53(8), 704-710. doi: 10.1111/j.1469-8749.2011.03996.x, PMC3130799.

Nidaamka Heerarka Qaybta Awooda Cunista iyo wax Cabista (EDACS)

Heerka I: Si badqab leh oo hufan ayuu cuntada iyo cabitaanka u qaataa

- Wuxuu cunaa noocyada kaladuwan ee cuntada ku haboon da'diisa.
- Waxaa ku adkaan kara cuntooyinka adag qaarkood iyo cuntooyinka la ruugo.
- Wuxuu cuntada ka wareejiyaa hal daan asagoo geeya kan kale; wuu xirikaraa bishimaha intuu raaminaayo.
- Wuxuu qabaa cabitaannada jilcan ama adag ee koobabka kaladuwan asagoo qurqurinaaya, ayna ku jirto inuu istarow ku dhooqo.
- Wuxuu soo qufici karaa ama soo daaci karaa cuntooyinka aadka u adag.
- Wuxuu wax ku cunaa kuna cabaa isla heerka ilmaha asaagiis ah.
- Wuxuu afka ku hayn karaa inta badan cuntada ama cabitaanka.
- Wuxuu cuntada ka saaraa dusha ilkaha wuxuuna inta badan cuntada ka saaraa qaanaha afka.

Farqiga u dhexeeya Heerarka I iyo II:

Marka loo eego Heerka I, shaqsiyaadka Heerka II ayaa qabi kara caqabado ka haysta cuntooyinka adag. Cunista iyo cabista ayaa wakhti dheeri ah ku qaadanaysa dadka ku jira Heerka II.

Heerka II: Wuxuu u cunaa uuna cabaa si amaan ah laakiin caqabado wadata

- Wuxuu cunaa noocyada kaladuwan ee cuntada ku haboon da'diisa.
- Waxaa ku adag cuntooyinka adag qaarkood, raamis badan, cuntooyinka isku dhafan ee isku dhagan.
- Wuxuu cuntada ka wareejiyaa hal daan asagoo geeya kan kale si gaabis ah oo adeegsanaaya carabka.
- Wuxuu raamin karaa bishimaha oo furan.
- Wuxuu qabaa cabitaannada jilcan ama adag ee inta badan koobabka kaladuwan asagoo qurqurinaaya; wuxuu ku dhooqi karaa istaraw.
- Wuxuu qufacaa ama soo tufaa cuntada cusub ama adag ama marka uu daalo.
- Mararka qaar wuu qufici karaa haddii cabitaanku si sib qado ama cunto badan afka loo gasho.
- Wuu daali karaa haddii cuntadu adag tahay wakhtiga cuntaduna wuu ka dheeraan karaa kan ilmaha asaagiis ah.
- Wuxuu lumiyaa cadad yar oo cunto ama cabitaan ah gaar ahaana cuntada dhibka badan.
- Cuntada qaar ayaa ku ururta dusha afka iyo daamanka iyo ciridka dhexdiisa.

Farqiga u dhexeeya Heerarka II iyo III:

Shaqsiyaadka ku jira Heerka II ayaa maareeya inta badan cuntooyinka da'da ku haboon waxayna qabaa cabitaanka marka waxyar loo fududeeyo. Shaqsiyaadka Heerka III ayaa u baahan doona in wax badan laga badelo cuntada si loo yareeyo khatarta ku saxashada.

Heerka III: Wuxuu cunaa uuna cabaa cuntada ayadoo ay jiraan khataraha badqabka; waxaa xadidnaan kara waxtarka

- Wuxuu cunaa cuntada jilcan iyo tan la ridqay wuxuuna qaniini karaa oo raamin karaa qaar kamid ah cuntooyinka raamiska jilicsan.
- Waxaa dhib u ah cadadka waawayn, raaminta adag iyo cuntooyinka ruugista u baahan taasoo keeni karta inuu ku saxdo ayna waxtari waydo.
- Way ku adag tahay inuu cuntada kasoo qaado hal daan uuna geeyo daanka kale,, inuu cuntada afka ku hayo, iyo inuu qaniino uuna ruugo cuntada si amaan ah.
- Shaqada cunista iyo cabista cuntada ayaa kaladuwan waxayna ku xiran tahay awoodaha guud ee jirka, goobta iyo caawimaada la siiyo.
- Wuxuu ka cabi karaa koob furan laakiin ka cabista koobna furan oo fur leh duleel ayaa loo baahan yahay si loo xakameeyo qulqulka cabitaanka.
- Wuu cabi karaa cabitaanka culus si fudud marka loo eego cabitaanka khafiifka ah wuxuuna u baahan karaa wakhti inta u dhexaysa kabashooyinka.
- Wuxuu dooran karaa inuu cabo keliya xaalado gaar ah sida marka uu la joogo daryeele uu ku kalsoon yahay ama uusan mashquulin.
- Noocyada gaarka ah ee cuntada iyo meelaha cuntada ee afka ayaa loo baahan yahay si loo yareeyo inuu ku saxdo.
- Wuu qufici karaa ama soo celin karaan haddii cabitaanku uu khafiif yahay ama cadad badan afka loo geliyo.
- Wuu daali karaa intuu cuntaynaayo haddii cuntadu u baahan tahay raamin wakhtiga cuntada ayaana dheeraan kara.
- Cuntada iyo luminta dareeraha ayaa suuragal ah cuntada ayaana ku uruuri kara dusha ilkaha, dusha afka, iyo inta u dhexaysa daamanka iyo ciridka.

Farqiga u dhexeeya Heerarka III iyo IV:

Shaqsiyaadka Heerka III ayaa maareeya luugista cuntada jilicsan. Shaqsiyaadka Heerka IV ayaa u baahan in si dhaw loola socdo lagana eego arimaha kaladuwan ee quseeya liqista cuntada iyo cabitaanka si amaan ah sabab la xiriirta saxashada wayn iyo khatarta ku leexashada cuntada.

Heerka IV: Wuxuu cunaa cuntada iyo cabitaanka asagoo ay jiraan xadidaadaha waawayn ee amaanka

- Wuxuu cunaa cuntada jilicsan ama aadka loo ridqay.
- Wuxuu dhib ku qabaa cuntada u baahan raaminta; saxashada ayaa imaan karta haddii uu cunto adag afka gashto.
- Mararka qaar waxaa ku adag inuu isku xiro wax liqida iyo neefsiga marka uu cuntaynaayo iyo markuu wax cabaayo sida ku cad astaamaha qarqamida.
- Way ku adag tahay inuu maareeyo dhaqdhaqaaqa cuntada iyo cabitaanka galaaya afka, si loo xakameeyo furista iyo xirista afka, iyo inuu maareeyo wax liqida, qaniinida iyo raaminta.
- Wuxuu sidiisa ku liqi karaa cuntadii oo uusan raamin.
- Waxaa u fudud inuu cabo cabitaanka la adkeeyay badelka kan fudud; cabitaanka adag ayuu u qaata si tartiib ah oo kabesi ah uuna ka cabo koob furan ayaa kordhin karta awoodiisa xakamaynta inta uu wax cabaayo.
- Wuxuu dooran karaa inuusan dareeraha cabin ama uu cabo keliya xaaladaha qaarkood sida marka uu la joogo daryeele uu ku kalsoon yahay.
- Waxay u badan tahay inuu u baahdo wakhti inta u dhexaysa luqmoonta cuntada si uu aad ugu raamiyo kahor inta uusan liqin.
- Wuxuu u baahan doonaa cuntooyin nooc gaar ah, sugnaanta cuntada, farsamooyin, daryeeleyaal xirfad badan, goob iyo bii'lo a fududeeyay si loo yareeyo khatarta saxashada iyo in cuntadu ku leexato loona kordhiyo hufnaanta.
- Wuu daali karaa inta uu cuntaynaayo wakhtiyada cuntada ayaana dheeraan kara.
- Cuntada iyo cabitaanka ayaa aad uga daata afka.
- Cuntada ayaa uga dhagi karta dusha ilkaha, saqafka kore ee afka iyo inta u dhexaysa ilkaha iyo ciridka.
- In tuubo lagu quudiya ayaa la dooran karaa.

Farqiga u dhexeeya Heerarka IV iyo V:

Shaqsiyaadka Heerka IV ayaa si badqab leh u liqi kara keliya haddii si dhow loola socdo nooca cuntada iyo cabitaanka iyo sidoo kale qaabka cuntada ama cabitaanka loo siinaayo. Shaqsiyaadka Heerka V ayaan si amaana ah u liqi karin. Gelinta cuntada ama cabitaanka afka ayaa keenaysa waxyeelo.

Heerka V: Ma cuni karo ama ma cabi karo si amaana ah

- Wuxuu liqi karaa cuntooyin yaryar ama dhadhano.
- Awooda maareynta dhadhano yar waxaa saamayn doona booska, arimaha shaqsiga ah iyo arimaha bii'ada.
- Ma awoodo inuu liqo cunto ama cabitaan si amaana ah sabab la xiriirta xadidaadaha heerka iyo isku darka dhaqdhaqaaqa wax liqista iyo neefsiga.
- Way ku adag tahay maareynta furista iyo xirista afka.
- Saxashada iyo qarqamida ayaa aad ugu badan.
- Waxyeelo uga timaado cuntada ku istaagta ayaa cadeyn leh.
- Wuxuu u baahan karaa tuubo ama daawo si loo furo marinta neefsiga.
- Qaababka kale ee siinta nafaqada sida tuubo ku quudinta ayaa la adeegsan karaa.

Kooxdaada Daryeelka

Taqasuslaha Qalabka Kaalmada/Bixiyaha Qalabka Caafimaadka

Wuxuu baaraa awooda bukaanka ee adeegsiga aaladaha tignooloojiyada Kaalmaatiga ah; wuu ku xiraa, wuu rakibaa ama wuxuu wax ka badelaa qalabka; oo wuxuu qiimeeyaa baahiyaha qalabka ee guriga, shaqada iyo dugsiga.

Dhakhtarka Maqalka

Wuxuu bixiyaa qiimeynada maqalka iyo baaritaanka.

Maaraynta Daryeelka

Wuxuu bixiyaa hanaanka iskaashi, ee goysku dhextaalka u yahay ee isku dubaridka daryeelka, qorsheynta, iyo u qareemida si looga taageero bukaannada iyo daryeeyaashooda maareynta xaaladaha balaaran ee caafimaadka. Adeegyada maareynta daryeelka ayay bixiyaan kooxo kalkaalisooiyin ah, shaqaalaha bulshada iyo khubarada helitaanka bukaanka kuwaasoo si dhow ula shaqeeya kooxdaada daryeelka.

Daryeelka Balaaran

wuxuu diirada saaraa qaybinta iyo isku xirka daryeelka carruurta iyo dhalinta qaba xanuunnada caafimaadka ee dabo dheeraaday ee balaaran. Waxaan kaala shaqeynaa adiga, dhakhtarkaaga guud iyo taqasusleyaasha kale si aan uga caawino bixinta qorshaha daryeelka balaaran. Waxaan kaashanaa dhakhtarka guud iyo taqasusleyaasha kale si aan xili hore u daboolno baahiyaha daryeelka.

Khabiirka Nolasha Ilmaha

Wuxuu ka caawiyaa carruurta hawlaha isbitaal dhigista iyo caafimaadka ee lagu baxsho ciyaar baxnaanin ah iyo kormeerada isbitaalka ee ilmaha ku haboon. Khubarada ayaa sidoo kale la kulma imaha walaalada ah (si looga jawaabo su'aalhooda iyo walacyadooda) waxayna ka qaybgeliyaan bukaannada iyo walaalaha hawlaha.

Hide sidayaasha

Talo bixinta hide sidaha ayaa ka caawisa qoysaska inay fahmaan khatarta u gudbinta cudurka hide sidaha ubadkaaga, noocyada baaritaanka hide sidaha ee ay tahay inay maraan, iyo sida dookhyo faahfaahsan looga gaaro xaaladaha balaaran.

Dhakhtarka Carruurta ee Kobaca iyo Habdhaqanka

Wuxuu bixiyaa talo ku aadan baaritaanka iyo helista cudurka carruurta qaba naafooyinka neerfeyaasha kobaca.

Dhakhtarka cilmi Nafsiyada Neerfaha

Wuxuu gacan ka gaaystaa baaritaanka iyo daawaynta xanuunnada ama dhibaatooyinka kobaca, caafimaadka, dhimirka iyo neerfaha; wuxuu la shaqeyn karaa dhakhaatiirta kobaca carruurta, khubarada neerfaha carruurta, dhakhaatiirta dhimirka ilmaha, dhakhaatiirta carruurta, baxnaaniyaasha shaqada, iyo baxnaaniyaasha hadalka iyo luuqada.

Kalkaalisada

Waxay bixisaa daryeel waxayna niyada u dhistaa bukaannada waxayna la shaqeysaa dhakhaatiirta kale. Kalkaalisooiyinku waxay sidoo kale baraan bukaanka iyo qoysaska cudurada laga helay, daawooyinka, habraacyada iyo baaritaannada labada xarumaha bukaan jiiifka iyo bukaan socodka.

Dhakhtarka Kalkaalinta (Nurse Practitioner, NP)

Wuxuu sameeyaa baaritaannada jirta iyo kuwa dhiiga, wuxuu la taliyaa bukaannada, wuxuu abuuraa barnaamijyada daawaynta.

Dhakhtarka Baxnaaninta Shaqada

Wuxuu baaraa xirfadaha Dhaqdhaqaaqa bukaanka, kuwaasookoobnaan kara sababo la xiriira murqo jawrar ama xakamayn la'aanta dhaqdhaqaaqa, wuxuu baraa bukaannada sida loo adeegsado qalabka shaqooyinka maalin kasta, sida quudinta, labiska, qoraalka, ama baarista bii'adooda. Baxnaaniyaasha jirka ayaa sidoo kale baara baahida bukaanka ee aaladaha socodka ee korontada ku shaqeeya kana caawiya bukaannada xirfadaha garaadka ee la xiriira xasuusta iyo madax banaanida.

Dhakhtarka indhaha

Wuxuu ku taqasusay ciladaha caafimaadka iyo qaliinka indhaha wuxuuna daweeeyaa cudurada indhaha, kobaca araga iyo indhaha. Dhakhtarka indhaha ayaa samayn kara qaliinka isha si uu u saxo dhibaatooyinka araga ee ka dhasha xanuunnada sida xanuunka gudaha ee strabismus.

Dhakhtarka Lafaha

Wuxuu naqshadeeyaa, rakibaa uuna xiraa noocyada kaladuwan ee qalabka lafaha (xajiyaa) ee dhudhumada kore iyo kuwa hoose, araxda iyo sinaha.

Dhakhtarka Neerfaha Carruurta

Wuxuu baaraa, helaa uuna daweeeyaa xanuunnada neerfaha. Dhakhtarka neerfaha carruurta waxay maareeyaan suuxdinada waxayna la shaqeeyaa dhakhaatiirta caafimaadka baxnaaninta Carruurta si ay ugu taliyaan caawimaadaha qaar kamid ah xanuunnada, sida ciladaha waxbarashada, habdhaqanka iyo dareemaha.

Dhakhtarka Qaliinka Neerfaha Carruurta

Wuxuu siiyaa daryeelka qaliinka balaaran bukaannada qaba xanuunnada saameeya laf dhabarta, qoorta, neerfaha iyo/ama maskaxda. Dhakhtarka Qaliinka Neerfaha Carruurta ayaa samayn kara qaliinnada sida qaliinka gaarka ah ee dorsal rhizotomy ama banka intrathecal baclofen si loo yareeyo jawrararka; geliya badhannada si loo yareeyo cadaadiska xad dhaafka ah ee dheecaanka ku jira maskaxda; ama rakiba qalabka neerfaha dejiya ee vagus si loo yareeyo qalalka.

Dhakhtarka Lafaha iyo murqaha ee Carruurta

Wuxuu baaraa lafaha bukaanka, qaab dhismeedka murqaha iyo dhaqdhaqaaqa kala goyska ee quseeya qaabka, shaqada iyo dhaqaaqa. Dhakhtarka lafaha ayaa sameeya qaliin si loo saxo shaqada lugaha ama gacmaha ilmaha marka uu koraayo.

Dhakhtarka afka iyo sanko (Ear Nose Throat, ENT)

Wuxuu ku taqasusay dhagaha, sanko iyo dhuunta, ayna ku jirto maareynta qaliinka xanuunnada neefta iyo maqalka.

Dhakhtarka Caafimaadka Baxnaaninta Carruurta

Wuxuu ku taqasusay adeegyada baxnaaninta—ayna ku jiraan baxnaaninta, lafaha, iyo daawooyinka afka ama la isku duro—wuxuuna ku taliyaa qalabka gaarka ah.

Baxnaaniniyaha Jirka

Wuxuu baaraa shaqada iyo awoodaha bukaanka; wuxuu ku taliyaa daawooyin si kor loogu qaado xirfadaha dhaqdhaqaaqa wuxuuna ka caawiyaa kahortaga dhibaatooyinka, sida jawrarka murqaha iyo luminta awooda. Marka uu kormeero heerka dhaqaaqa, awooda iyo tayada shaqada, baxnaaniyaasha jirka ayaa ka caawiya bukaanka kordhinta madax banaanidooda iyo dhaqdhaqaaqooda. Baxnaaniyaasha kirka ayaa sidoo kale ka caawiya qoysaska helitaanka qalabka kaalmaatiga, sida qaadista aaladaha iyo aaladaha istaaga.

Dhakhtarka Nafsiyada/Dhimirka

Wuxuu kala shaqeeyaa bukaannada baarista iyo dawaynta noocyada badan ee xanuunnada dhimirka iyo sidoo kale ka caawinta maareynta xanuunnada. Wuxuu siiyaa baxnaaninta dhimirka si uu u xaliyo dhibaatooyin dhawr ah (tusaale, walwalka, niyad jabka, ku dhaqanka, la qabsiga xanuunka xanuunka) iyo sidoo kale baaritaanka dhimirka si loo baaro aagaga kaladuwan ee xanuunka, shucuurta, iyo shaqada habdhaqanka.

Taqasuslaha Caafimaadka Hurdada

Wuxuu baaraa uuna daweeeyaa heerka xanuunnada hurdada. Baaritaanka ayaa daboolka ka qaadi kara xanuunnada la socda, sida qalalka, ee la socon kara ciladaha hurdada.

Shaqaalaha Bulshada

Wuxuu ka caawinayaa qoysaska go'aaminta awoodaha iyo baahiyaha, kadib wuxuu aqoonsadaa khayraadka bulshada ee adeegyada buuxinaaya baahiyaha goyska; wuxuu siiyaa taageerada waxbarashada iyo shucuurta ee daryeeyaasha iyo qoysaska; wuxuu ka caawiyaa qoysaska inay dalbadaan qalabka gaarka ah ee caafimaadka; wuxuuna ka caawiyaa baahiyaha taagan ee caafimaadka sida hooyga iyo gaadiidka. Shaqaalaha bulshada ayaa sidoo kale siiya tao bixin bukaannada iyo qoysaska.

Dhakhtarka Hadalka iyo Luuqada

Wuxuu baaraa awooda bukaanka ee hadalka, wuxuu baaraa ciladaha wax liqida, wuxuuna ku taliyaa qaababka kor loogu qaado badqabka cuntada iyo cabitaanka. Baxnaaniyaasha hadalka iyo Luuqada ayaa sidoo kale baari kara baahida bukaanka ee aaladaha hadalka kaaba waxayna ka caawiyaan xulashada qalabka ku haboon.

Taqasuslaha Daawaynta Raaxaysiga leh

Wuxuu baaraa awoodaha bukaannada wuxuuna ku taliyaa barnaamijyada si looga caawiyo abuurista noloshu nasiinada caafimaadka leh. Taqasuslaha Daawaynta Raaxaysiga leh ayaa bixiya waxbarashada fasaxa, ka caawiya xirfadaha fasaxa, kalana shaqeeya khayraadka bulshada si looga caawiyo bukaannada kordhinta shaqooyinka dalxiiska.

HIMILADA

Aduunto ilmo kasta awoodo inuu abuuro sheekadiisa gaarka ah.



gillettechildrens.org

Ciwaanka Boostada:

200 University Ave. E.
St. Paul, MN 55101

Si aad u aragto dhammaan goobaha xarumaheena, booqo gillettechildrens.org/locations

Balamaha Bukaanka

651-290-8707 / 800-719-4040

Soo Gubbinta iyo Talooyinka Dhakhtarka

651-325-2200 / 855-325-2200

Gillette Children's waa hogaanka caalamiga ah ee daryeelka bukaannada qaba xanuunnada maskaxda, lafaha iyo dhaqdhaqaaqa ee ka biloowda carruurnimada. Cilmi baaristeenada, daawaynta iyo tignooloojiyadaha taageerada ayaa u sahlaaya ilmo kasta inuu helo nolol buuxda oo ku dhisan riyoyinkiis, maaha cudurada laga helay. Ayadoo la aasaasay sanadkii 1997. Gillette ayaa la shaqeysa bukaannada, qoysaska iyo iskaashatadeena ee hogaanka caafimaadka, cilmi baarista iyo u doodista si loo abuuro daryeelka sugan iyo fursad ay helaan carruurta qaba caqabadaha caafimaad ee balaaran. Si aad xog badan uga ogaato Gillette, booqo gillettechildrens.org.

Copyright 2022. Gillette Children's. Dhammaan xuquuqahu way dhowran yihiin.

